# WARKA WANAAGSAN

# INJIILKA YESHUUCA

*(SIDA RASUUL YOOXANAA)*

## Erayguna Jidh buu noqday

**1** Bilowgii waxaa jiray Erayga, Erayguna
wuxuu la jiray Ilaah, Erayguna wuxuu ahaa
Ilaah. 2 Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. 3 Wax
walba waxaa laga sameeyay xaggiisa, oo wixii
la sameeyay lama samayn isaga la'aantiis. 4
Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay
ahayd nuurka dadka. 5 Nuurkuna wuxuu ka
iftiimiyaa gudcurka, gudcurkuna kama badin.
6 Waxaa jiray nin xagga Ilaah laga soo diray,
magiciisuna wuxuu ahaa Yooxanaa. 7 Isagu
wuxuu u yimid markhaati furid, inuu u marag
furo nuurka, si ay dhammaan xaggiisa ka
wada rumaystaan. 8 Isagu nuurka ma uu
ahayn, laakiin wuxuu u yimid inuu nuurka u
marag furo.
9 Nuurka runta ah oo iftiimiya qof walba,
dunida wuu imanayay. 10 Wuxuu ku jiray
dunida, dunidana waxaa laga sameeyay
xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga.
11 Wuxuu u yimid kuwiisa, kuwiisiina ma aysan
aqbalin isaga. 12 Laakiin in alla intii aqbashay,
oo magaciisa rumaysatay, wuxuu siiyay amar
ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, 13 oo aan ka
dhalan dhiigga, ama doonistii jidhka, ama dad
doonistiis, laakiin waxay ka dhasheen Ilaah.

14 Eraygii jidh buu noqday, oo wuu inagu dhex noolaaday, oo waxaanu aragnay ammaantiisa, ammaantii Wiilka keliya ee Aabbaha ka yimid, oo nimco iyo run ka buuxa. 15 (Yooxanaa waa u marag furay isaga, wuxuuna ku qayliyay oo yidhi, "Kanu waa kii aan idhi: Kan iga daba imanaya wuu iga horreeyey, waayo, hortay buu jiray.") 16 Dhammaanteen waxaynu buuxnaantiisa ka helnay nimco ka nimco. 17 Waayo, sharciga waxaa la siiyay Muuse, laakiinse nimcada iyo runta waxay ku yimaaddeen Yeshuuca Masiix. 18 Ninna weligiis Ilaah ma arkin, Ilaah kaliya oo laabta Aabbaha ku jira ayaa muujiyay isaga.

## Maragfurkii Yooxanaa Baabtiisaha

19 Kanu waa maraggii Yooxanaa furay, markii Yuhuuddu Yeruusaalem uga soo direen wadaaddo iyo kuwo reer Laawi ah inay waydiiyaan oo ku yidhaahdaan: "Yaad tahay?" 20 Isagu waa qirtay, mana uu inkirin, laakiinse wuxuu qirtay, "Anigu ma ihi Masiixa." 21 Markaasay waydiiyeen, "Haddaba yaad tahay? Ma Eliyaas baad tahay?" Wuxuu yidhi, "Ma ihi." "Ma nebigii baad tahay?" Wuxuu ku jawaabay: "Maya." 22 Markaasay ku yidhaahdeen, "Yaad tahay? Si aannu jawaab ugu celinno kuwii na soo diray. Yaad isku sheegaysaa?" 23 Wuxuu yidhi, "Waxaan ahay codka kan cidlada kaga dhawaaqaya: 'Jidka Rabbiga toosiya,’ siduu Nebi Ishacyaah u

yidhi."
24 (Kuwa la soo diray waxay ka yimaaddeen
Faarisiinta.) 25 Markaasay waydiiyeen:
"Haddaba maxaad dadka u baabtiistaa
haddaadan ahayn Masiixa ama Eliyaas ama
nebigii?" 26 Yooxanaa wuxuu ugu jawaabay oo
ku yidhi, "Anigu dadka waxaan ku baabtiisaa
biyo, laakiin dhexdiinna waxaa jooga mid
aydan garanaynin 27 oo ah kan iga daba
imaanaya, kan aanan istaahilin inaan
suumanka kabahiisa furo." 28 Waxyaalahan
waxay ka dhaceen Beytaniya oo ku taal Urdun
shishadeeda, halkaas oo uu Yooxanaa dadka
ku baabtiisayay.

## Bal Eega, Wanka Ilaah

29 Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu arkay
Yeshuuca oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi,
"Bal eega Wanka Ilaah oo dembiga dunida
qaadaya! 30 Kanu waa kii aan idhi, Waxaa iga
daba imaanaya nin iga horreeyey, waayo,
hortay buu jiray. 31 Anigu ma aan garanaynin
isaga, laakiin inuu Israa'iil u soo muujiyo dartiis
ayaan u imid anigoo dadka biyo ku
baabtiisaya." 32 Yooxanaa waa marag furay
isagoo leh: "Waxaan arkay Ruuxa oo samada
uga soo degaya sidii qoolley oo kale, wuuna
ku dul joogsaday isagii." 33 Anigu ma
garanaynin isaga, laakiin kii ii soo diray inaan
dadka biyo ku baabtiiso, wuxuu igu yidhi, 'Kii
aad ku aragtid Ruuxa oo ku soo degaya oo ku

dul joogsanaya, kaasu waa kan dadka ku
baabtiisa Ruuxa Quduuska ah.’ 34 Anigu waan
arkay, waana ka marag furay inuu kani yahay
Wiilka Ilaah.”

## Xertii Ugu Horraysay

35 Maalintii ku xigtay Yooxanaa wuxuu la
taagnaa laba xertiisa ah. 36 Oo wuxuu arkay
Yeshuuca oo soo socda, wuxuuna ku yidhi,
"Bal eega Wanka Ilaah!" 37 Labadii xerta ahayd
markay hadalkiisa maqleen, way raaceen
Yeshuuca. 38 Markuu Yeshuuca soo jeestay oo
arkay iyagoo daba socda, ayuu ku yidhi,
"Maxaad doonaysaan?" Waxay ku
yidhaahdeen: "Rabbi (oo macnaheedu yahay
Macallin) Halkeed deggantahay?" 39 Wuxuu ku
yidhi, "Kaalaya oo waad arki doontaan."
Markaasay yimaadeen oo arkeen meeshuu
degganaa, wayna la joogeen maalintaas.
Goortaas waxay ahayd qiyaastii saacaddii
tobnaad. 40 Mid ka mid ah labadii maqashay
wixii uu Yooxanna yidhi oo raacday, wuxuu
ahaa Andaros, Simoon Butros walaalkiis. 41
Marka hore wuxuu helay walaalkiis Simoon oo
ku yidhi, "Waannu helnay Masiixa (oo
macnaheedu yahay Kiristoos.)" 42 Wuxuuna u
keenay Yeshuuca. Yeshuucana wuu eegay
isaga oo ku yidhi, "Adigu waxaad tahay
Simoon ina Yooxanaa. Waxaa laguugu yeedhi
doonaa Keeyfas (oo macnaheedu yahay
Butros)."

# Yeshuuca oo u yeedhay Filibos iyo Nataana’el

43 Maalintii labaad Yeshuuca wuxuu
go’aansaday inuu Galili tago, oo wuxuu helay
Filibos oo ku yidhi, "Isoo raac." 44 Haddaba
Filibos wuxuu ahaa reer Beytsayda oo ah
magaaladii Andaros iyo Butros. 45 Filibos
wuxuu helay Nataana’el oo wuxuu ku yidhi,
"Waxaannu helnay kii ay sharcigii Muuse iyo
nebiyadu wax ka qoreen, waana Yeshuuca
reer Naasared ina Yuusuf." 46 Nataana’el
wuxuu ku yidhi, "Ma wax wanaagsan baa ka
imaan kara Naasared?" Markaasaa Filibos
wuxuu ku yidhi, "Kaalay oo arag." 47 Yeshuuca
wuxuu arkay Nataana’el oo soo socda, oo
wuxuu ku yidhi, "Bal eega, kanu waa mid reer
Israa’iil oo run ah oo aan khiyaano lahayn." 48
Nataana’el wuxuu ku yidhi, "Sideed ii
garanaysaa?" Yeshuuca ayaa u jawaabay oo
ku yidhi, "Intaan Filibos kuu yeedhin ka hor,
markaad geedkii berdaha hoostiisa joogtay,
ayaan ku arkay." 49 Kolkaasaa Nataana’el u
jawaabay: "Macallinow, waxaad tahay Wiilka
Ilaah. Waxaad tahay boqorkii Israa’iil." 50
Yeshuuca ayaa u jawaabay: "Ma inaan kugu
idhi: ‘Geedka berdaha hoostiisa ayaan kugu
arkay darteed, miyaad u rumeysatay?’ Waxaad
arki doontaa waxyaalo kuwan ka waaweyn.” 51
Markaasuu ku yidhi, "Runtii, runtii, waxaan ku
leeyahay, Waxaad arki doonta samada oo

furan iyo malaa’igaha Ilaah oo kor u kacaya oo ku soo degaya Wiilka Aadanaha."

## Arooskii Magaalada Kaana Lagu Sameeyay

**2** Maalintii saddexaad waxaa Kaana Galili ka
jiray aroos, Yeshuuca hooyadiisna halkaas
ayay joogtay. 2 Yeshuuca iyo xertiisii arooskii
ayaa lagu casuumay. 3 Markii khamriga
dhammaaday Yeshuuca hooyadiis waxay
isaga ku tidhi: "Iyaga khamri uma yaallo." 4
Markaasuu Yeshuuca wuxuu iyada ku yidhi,
"Haweeney yahay, maxaa tan iga khuseeya?
Saacadaydu weli ma gaadhin." 5 Hooyadiis
waxay adeegayaashii ku tidhi: "Sameeya wax
kasta uu idinku yidhaahdo." 6 Meeshaas
waxaa yaalay lix ashuun oo dhagax ah oo loo
dhigay caadada Yuhuudda ee daahirinta,
ashuun kastana wuxuu qaadi jiray sideetan
ilaa boqol iyo labaatan litir. 7 Markaasaa
Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Ashuumada biyo
ka buuxiya, iyaguna way buuxiyeen ilaa afka."
8 Kadibna wuxuu ku yidhi, "Ka soo dhura oo u
geeya sayidka iidda," wayna u geeyeen. 9
Sayidka iidda markuu dhadhamiyey biyihii lagu
bedelay khamriga, ma uusan ogaan meel ay
ka yimaadeen, (laakiin adeegayaashii oo soo
dhureen biyaha way ogaayeen), kadib sayidka
iidda ayaa u yeedhay ninkii arooska, 10 oo ku
yidhi, "Nin kasta marka hore wuxuu soo saaraa

khamriga wanaagsan, oo markay martidu in ku
filan cabaan kadib ayay soo saaraan khamriga
liita; laakiin adigu khamrigii ugu wanaagsanaa
ilaa hadda ayaad dhawrtay." 11 Tanu waxay
ahayd mucjisooyinkii ugu horeeyay ee uu
Yeshuuca ku sameeyay Kaana Galili oo wuxuu
ku muujiyay ammaantiisa, xertiisuna way
rumeeyeen isaga.
12 Kadib, wuxuu tegay Kafarna'um, isaga iyo
hooyadiis iyo walaalihiis iyo xertiisa, oo dhawr
maalmood ayay halkaas joogeen.

## Yeshuuca oo Macbudka Nadiifiyey

13 Iiddii Kormaridda ee Yuhuudda waa
dhowayd, Yeshuucana wuxuu kor u aaday
Yeruusaalem. 14 Oo wuxuu macbudka ku arkay
kuwo ku iibinaya dibiyo iyo ido iyo qoolleyo, iyo
sariflayaal halkaas fadhiya. 15 Markaasuu
xadhko karbaash ka sameeyay, kadibna dadkii
oo dhan ayuu macbudka ka eryay, dibiyada iyo
idaha labadaba, oo lacagtii sariflayaasha ayuu
daadiyay, miisaskiina wuu rogay. 16 Oo kuwii
qoolleeyada iibinayayna wuxuu ku yidhi,
"Waxyaalahan halkan ka qaada. Guriga
Aabbahay ha ka dhigina suuq." 17 Xertiisu
waxay xusuusteen in la qoray; "Qiiradaan
gurigaaga u qabo ayaa i gubaysa."
18 Sidaa darteed Yuhuuddu waxay ku
yidhaahdeen, "Calaamaddee ayaad na
tusaysaa waxyaalahan aad samaynayso
darteed?" 19 Yeshuuca ayaa u jawaabay;

sss
"Macbudkan dumiya, oo saddex maalmood
kadib ayaan soo kicin doonaa." 20 Yuhuuddu
waxay yidhaahdeen "Lix iyo afartan sano ayaa
macbudkan la dhisayay, adiguna ma waxaad
ku kicinaysaa saddex maalmood?" 21 Laakiin
isagu wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa
ah. 22 Sidaa darteed markuu dhimashada ka
soo sarakacay kadib ayay xertiisiina erayadan
uu dhahay xusuusteen, wayna rumeysteen
Qorniinka iyo erayadii Yeshuuca ku hadlay.
23 Markuu Yeruusaalem joogay wakhtigii Iiddii
Kormaridda, dad badan ayaa magiciisa
rumeystay markay arkeen calaamooyinkii uu
sameeyay. 24 Laakiin Yeshuuca qudhiisu
iskuma hallaynin iyaga, waayo, dadka oo dhan
ayuu garanayay, 25 Oo uma baahneyn cidna
inay ka marag furto dadka, waayo, wuu ogaa
waxa dadka ku jira.

## Waa inaad mar kale Dhalataan

**3** Waxaa jiray nin ka mid ahaa Faarisiinta oo
la odhan jiray Nikodemos oo Yuhuudda taliye u
ahaa. 2 Isagu habeenkii ayuu u yimid
Yeshuuca, wuxuuna ku yidhi, "Macallinow,
waannu ognahay inaad tahay macallin xagga
Ilaah ka yimid, waayo, ninna ma samayn karo
calaamooyinkan aad samayso haddaan Ilaah
la jirin isaga." 3 Yeshuuca ayaa u jawaabay:
"Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, qof
haddaanu mar kale dhalanin, boqortooyada
Ilaah ma arki karo." 4 Nikodemos wuxuu ku

sss

yidhi, "Sidee nin mar kale u dhalan karaa
isagoo duq ah? Miyuu mar kale uurkii
hooyadiis geli karaa oo ka dhalan karaa?" 5
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay: "Runtii, runtii,
waxaan kugu leeyahay, qof haddaanu ka
dhalanin biyo iyo Ruuxa, boqortooyadii Ilaah
ma geli karo. 6 Waxa jidhka ka dhashaa waa
jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux. 7
Ha la yaabin haddaan ku leeyahay, ‘Waa inaad
mar kale dhalataan.’ 8 Dabayshu way u
dhacdaa meesha ay doonto, waxaad
maqashaa codkeeda, laakiin ma garanaysid
meeshay ka timaaddo iyo meeshay u socoto;
sidaas oo kale ayay la mid tahay mid kasta oo
Ruuxa ka dhashay." 9 Nikodemos ayaa ku
yidhi, "Sidee baa waxyaalahan u ahaan
karaan?" 10 Yeshuuca ayaa u jawaabay:
"Waxaad tahay macallinka Israa’iil, oo
waxyaalahan ma garanaysid? 11 Runtii, runtii,
waxaan ku leeyahay, waxaannu ka hadalnaa
waxaannu garaneyno, oo waxaannu ka marag
furnaa waxaannu aragnay, laakiin idinkuna
maraggeena ma aqbashaan. 12 Haddaan
waxyaalaha dunida ka hadlay oo aydaan
rumaysanin, sidee ayaad ku rumaysan
doontaan haddaan waxyaalaha jannada ka
hadlo? 13 Ninna jannada kor uma tegin, kii
jannada ka soo degay mooyee, kaasoo ah
Wiilka Aadanaha. 14 Sidii Muuse maska kor
ugu qaaday cidlada, sidaas oo kale Wiilka
Aadanaha waa in kor loo qaado, 15 si mid kasta
oo isaga rumaystaa uu lahaado nolosha
weligeed ah.

# Ilaah dunida wuu jeclaa

[16] Ilaah dunida wuu jeclaa sidaas aawadeed ayuu u siiyay Wiilkiisa keliya si mid kasta oo isaga rumaystaa uusan u halaagmin balse uu lahaado nolosha weligeed ah. [17] Ilaah Wiilkiisa dunida uguma soo dirin inuu dunida xukumo, laakiin inay dunidu ku badbaaddo isaga. [18] Kii isaga rumaystaa ma xukumna, laakiin kii aan isaga rumaynin, hore ayaa loo xukumay, waayo, wuxuu rumaysan waayay magaca Wiilka Ilaah ee keliya. [19] Xukunka waa sidan: Nuurka ayaa dunida yimid, laakiin dadku waxay iftiinka ka jeclaadeen gudcurka, waayo, shaqooyinkooda shar bay ahaayeen. [20] Qof kasta oo shar falaa nuurka ayuu neceb yahay, mana u yimaado nuurka, si aan shaqadiisa loogu muujin. [21] Laakiinse kii runta falaa, nuurka wuu u yimaadaa si shaqadiisa ugu muuqato in Ilaah xaggiisa laga sameeyay.

# Yooxaana Baabtiisihii wuxuu sareeysiiyay Masiixa

[22] Kadib Yeshuuca iyo xertiisa waxay tageen dhulka Yahuudiya, oo halkaas ayuu la joogay iyaga oo dad ku baabtiisay. [23] Yooxanaa wuxuu dad ku baabtiisay Caynoon oo ku dhow Saalim, waayo, halkaas waxay lahayd biyo badan, dadkuna way imaanayeen waana la baabtiisay. [24] (Waayo, Yooxanaa weli xabsiga

laguma tuurin). [25] Marka dood ku saabsan is daahirinta ayaa ka dhex dhacday xertii Yooxaana iyo nin Yuhuudi ah. [26] Yooxanaa ayay u yimaadeen oo ku yidhaahdeen, "Macallinow, kii kula jiray Urdun shishadeeda oo aad marag u furtay dadka ayuu baabtiisayaa, oo dadkii oo dhanna way u tagayaan." [27] Yooxanaa wuxuu ugu jawaabay, "Ninna waxba ma heli karo haddaan jannada laga siinin. [28] Idinka qudhiinna markhaatiyaal baad ka tihiin inaan idhi: ‘Anigu ma ihi Masiixa, laakiin hortiisa ayaa la i soo diray.' [29] Kan haystaa aroosadda waa ninka arooska ah. Saxiibka ninka arooska ah, kan taagan oo maqla isaga, aad buu ugu farxaa markuu maqlo codka ninka arooska ah. Sidaas daraadeed farxaddaydeydu hadda waa dhammaystirantahay. [30] Isagu waa inuu kordho, aniguna waa inaan yaraado.

## Markhaatiga Jannada Ka Yimid

[31] "Kii xagga sare ka yimaada, dhammaan ayuu ka sarreeyaa; kii dhulka ka yimaada waa kii dhulka, oo wuxuu ka hadlaa waxa dhulka. Kii jannada ka yimaada, dhammaan ayuu ka sarreeyaa. [32] Wuxuu ka maragfuraa waxyaalaha uu arkay oo maqlay, laakiin ninna maraggiisa ma aqbalo. [33] Kii maraggiisa aqbalay wuxuu cadeeyay in Ilaah run yahay. [34] Waayo, kii Ilaah soo diray ayaa erayga Ilaah ku hadla, waayo, isagu Ruuxa qiyaas la'aan

ayuu u siiya. [35] Aabbuhu wuu jecelyahay
Wiilka, oo wax walba gacantiisa ayuu galiyay.
[36] Kii Wiilka rumaysta, nolosha weligeed ah
ayuu leeyahay, kii aan Wiilka adeecin, nolosha
ma arki doono, laakiin cadhada Ilaah ayaa ku
sii jirta isaga.

## Yeshuuca Iyo Islaantii Reer Samaariya

**4** Haddaba markuu Yeshuuca ogaaday inay
Faarisiintii maqleen inuu samaynayo oo
baabtiisayo xer ka badan intii Yooxanaa, [2] (in
kastoo Yeshuuca qudhiisu uusan baabtiisin,
laakiinse xertiisa), [3] ayuu Yuhuudiya ka tegay,
wuxuuna mar kale u kacay Galili. [4] Oo waxaa
lagama maarmaan ahayd in uu Samaariya sii
dhex maro. [5] Marka wuxuu yimid magaalada
Samaariya, oo Sukhar la odhan jiray, oo ku
dhowayd dhulkii Yacquub siiyay wiilkiisa
Yuusuf. [6] Waxaana meeshaas ku yaalay ceelkii
Yacquub. Marka Yeshuuca oo sodcaal ku soo
daalay, wuxuu fadhiistay ceelka agtiisa. Waxay
ahayd qiyaastii lix saac.
[7] Naag ayaa Samaariya ka timid si ay biyo u
dhaansato. Yeshuuca ayaa ku yidhi iyada, "I
waraabi." [8] (Maxaa yeelay, xertiisu
magaaladay ku maqnaayeen si ay cunto u soo
iibsadaan). [9] Naagtii reer Samaariya waxay ku
tidhi isaga, "Sideed adiga oo Yuhuudi ah biyo ii
weydiisanaysaa, aniga oo naag reer

sss

Samaariya ah?" (Waayo, Yuhuudda iyo Samaariyiintu xidhiidh kama dhexeeyo). 10 Yeshuuca ayaa u jawaabay: "Haddaad garan lahayd hadiyadda Ilaah iyo kuu yahay kan kugu leh, ‘I waraabi,’ adiga waad weydiisan lahayd isaga oo wuxuu ku siin lahaa biyaha nool." 11 Naagtii waxay ku tidhi: "Sayidow, waxaad biyo ku dhaansato ma haysatid, ceelkuna wuu dheeryahay. Marka xaggeed ka helaysaa biyahaas nool? 12 Miyaad ka weyn tahay aabbaheenna Yacquub, Isagaa ceelka na siiyay oo isaga qudhiisaana ka cabbay iyo wiilashiisa iyo xoolihiisuba?" 13 Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Ku alla kii biyahan ka cabba, mar kale wuu harraadi doonaa, 14 Laakiin ku alla kii biyaha aan siin doono ka cabba, weligiis ma harraadi doono. Laakiin biyaha aan siin doono waxay guddahiisa ku noqon doonaan il biyo ka durdurayaan illaa iyo nolosha weligeed ah." 15 Naagtii waxay ku tidhi: "Mudane, biyahan i sii, si aanan u harraadin oo aanan halkan u iman inaan ka dhaansado." 16 Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Tag oo ninkaagii u soo yeedh, oo halkan kaalaya." 17 Naagtii ayaa u jawaabtay, "Nin ma lihi." Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Waad ku saxsantahay in aad tidhi, ‘nin ma lihi.’ 18 Waayo, shan nin ayaad lahayd oo kan aad hadda haysatidna ninkaagii ma aha; taas run baad ku sheegtay." 19 Naagtii waxay ku tidhi, “Mudane, waxaan arkaa inaad nebi tahay. 20 Aabbayaasheen buurtan ayay ku caabudi jireen, idinkuse waxaad tidhaahdaan, ‘Yeruusaalem waa meesha ay waajibka tahay

in lagu caabudo.” 21 Yeshuuca ayaa ku yidhi,
"haweenayahay, i rumee, saacaddu waa
imanaysaa markii aydnaan Aabbaha buurtan
ama Yeruusaalem ku caabudi doonin. 22 Idinku
waxaad caabuddaan wax aydnaan aqoon,
annaguse waxaannu caabudnaa waxaannu
naqaan, waayo, badbaadadu waxay ka
timaaddaa Yuhuudda. 23 Laakiin saacadda baa
imanaysa, wayna joogtaa iminkada, markii
caabudayaasha runta ah ay Aabbaha ku
caabudi doonaan ruuxa iyo runta, waayo,
Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas
oo kale. 24 Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa
isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo
runta.” 25 Naagtii waxay ku tidhi; "Waan ogahay
Masiixu inuu imanayo (kan loogu yeedho
Kiristoos); oo markuu yimaado, wax walba
ayuu noo sheegi doonaa." 26 Yeshuuca ayaa
ku yidhi, "Anigoo kula hadlaya ayaa ah isaga."
27 Markaas kadib xertiisa ayaa yimaaddeen,
wayna la yaabeen markay arkeen inuu naag la
hadlayo. Laakiin ninna ma odhanin, "Maxaad
ka doonaysaa?” ama, “Maxaad ula hadlaysaa
iyada?" 28 Sidaa aawadeed naagtii ayaa
ashuunkeedii ka tagtay, oo magaaladii u
baxday oo waxay ku tidhi dadkii, 29 "Kaalaya
oo arka ninka ii sheegay wax walba oo aan
sameeyay. Kanu ma ahaan karaa Masiixa?" 30
Markaasay magaaladii ka soo baxeen wayna u
yimaaddeen isaga.

31 Markaas ayay xertiisii baryeen iyaga oo leh,
"Macallinow, wax cun." 32 Laakiin wuxuu iyaga
ku yidhi, "Anigu waxaan haystaa cunto aan

cuno oo aydnaan ogayn." 33 Haddaba xertiisii
waxay isku yidhaahdeen, "Ma qof ayaa cunto
u keenay?" 34 Yeshuuca ayaa ku yidhi,
"Cuntadaydu waa inaan sameeyo doonista
kan i soo diray oo aan shuqulkiisa
dhammeeyo. 35 Miyaydaan odhanin, ‘Afar
bilood ayaa hadhay ka dibna waa beergoyskii?
Bal eega, waxaan idin leeyahay, Indhihiina kor
u qaada oo eega inay durba beeraha u cad
yihiin beergooyska. 36 Kii gooya mushaar ayuu
helaa, wuxuuna midho u uruuriyaa nolosha
weligeed ah, si ay kii beeray iyo kii gooyaaba
iskula farxaan. 37 Hadalku waa ku run halkan,
‘Mid baa beera, mid kalena wuu gooyaa.’ 38
Waxaan idiin diray inaad goysaan wixii
aydnaan ku hawshoon. Kuwa kale ayaa
hawshooday, hawshoodiina waad gasheen."

39 Waxaana magaaladaas ka rumaystay isaga
dad badan oo reer Samaariya ah, maragga
naagta aawadeed, "Wuxuu ii sheegay wax
walba aan sameeyay." 40 Sidaa darteed
markay dadka reer Samaariya u yimaaddeen
isaga, waxay ka baryeen inuu la joogo, wuxuu
halkaas joogay laba maalmood. 41 Oo kuwo
kale oo badan ayaa rumaysteen hadalkiisa
aawadiis. 42 Oo waxay naagtii ku yidhaahdeen:
"Waxaannu u rumaysanaynaa ma aha
hadalkaaga aawadiis, maxaa yeelay, annaga
qudhayadu waannu maqalnay oo waannu
naqaan inuu kanu runtii yahay Badbaadiyaha
dunida."

43 Labadaas maalmood dabadeed ayuu Galili
ka tegay. 44 (Oo Yeshuuca qudhiisa ayaa ka

marag kacay inaanu nebi waddankiisa sharaf
ku lahayn). 45 Haddaba markuu Galili yimid,
reer Galili way soo dhoweeyeen, maxaa
yeelay, iyagoo arkeen wixii uu sameeyay iidda
Yeruusaalem oo dhan, waayo, iyaguna iiddii
way tageen.

## Yeshuuca Wuxuu Bogsiiyay Wiilkii Sarkaalka

46 Haddana mar kale ayuu yimid Kaana tii Galili
oo ahayd meeshuu biyihii khamriga kaga
dhigay. Oo Kafarna'um waxaa joogay sarkaal
wiilkiisu ku bukay. 47 Oo markuu maqlay inuu
Yeshuuca Yuhuudiya ka yimid oo Galili
gaadhay, ayuu u tegay oo ka baryay inuu u
yimaado oo wiilkiisa bogsiiyo, waayo,
dhimashuu u dhawaa. 48 Haddaba Yeshuuca
wuxuu ku yidhi, "Haddaydnaan calaamooyin
iyo waxyaabo la yaab leh arkin, marnaba ma
rumaysan doontaan."
49 Sarkaalkii ayaa ku yidhi, "Sayidow, kaalay
intuusan wiilkayga dhiman." 50 Yeshuuca ayaa
ku yidhi, "Soco, wiilkaaga wuu noolyahay."
Ninkii wuu rumaystay hadalkii Yeshuuca ku
yidhi, wuuna socday. 51 Intuu socday ayaa
addoommadiisii ka hor yimaadeen, iyagoo leh,
"Wiilkaagii wuu noolyahay." 52 Markaasuu
wuxuu iyagii weydiiyey saacadduu bogsaday.
Waxay ku yidhaahdeen, "Shalayto saacaddii
toddobaad ayay qandhadii daysay." 53 Sidaas
daraadeed ayuu aabbuhu ogaaday inay

saacaddaasu ahayd markuu Yeshuuca ku yidhi, "Wiilkaaga wuu noolyahay." Markaasuu isaga qudhiisa rumaystay iyo kuwii gurigiisa joogay oo dhan. [54] Tanu waxay ahayd calaamadii labaad oo Yeshuuca sameeyay markuu Yuhuudiya ka tegay oo Galili yimid.

## Curyaankii La Bogsiiyay

**5** Markaas kadib waxaa jirtay iidda Yuhuudda, oo Yeshuuca Yeruusaalem ayuu u kacay. [2]
Waxaa Yeruusaalem ku yaallay Albaabka Idaha agtiisa, war biyo ah oo afka Cibraaniga lagu yidhaahdo Beytesda oo leh shan balbaladood. [3] Waxaa halkaas jiifay dad badan oo bukaan ah, oo indha la’ oo laxaad la’ oo curyaan ah. [4] Maxaa yeelay, malag ayaa marmar barkadda ku soo degi jiray oo biyaha qasi jiray; oo kan ugu hor galo biyaha markii la qaso dabadeed wuu ka bogsaday cudur kastuu qabay. [5] Waxaa halkaas joogay nin siddeed iyo soddon sannadood bukay. [6] Oo Markuu Yeshuuca arkay isaga oo jiifa oo gartay inuu muddo dheer xaaladdan ku jiray, wuxuu ku yidhi, "Ma doonaysaa inaad bogsato?" [7] Ninkii bukay ayaa ku jawaabay: "Mudane, qof ma haysto si aan u galo barkadaan markii biyaha la walaaqo, markaan imaado mid kale ayaa iga hor gala." [8]
Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Kac oo sariirtaada qaado oo soco." [9] Isla markiiba ninkii wuu bogsaday wuuna qaatay sariirtiisii oo socday.

Maalintaasuna waxay ahayd Sabtidii. 10 Sidaa
darteed Yuhuuddu waxay kii la bogsiiyay ku
yidhaahdeen: "Waa Sabti, oo xalaal kuuma
aha inaad sariirtaada qaadatid." 11 Laakiin
wuxuu ugu jawaabay: "Kii i bogsiiyay ayaa igu
yidhi, Sariirtaada qaado oo soco." 12
Markaasay waydiiyeen: "Waa ayo ninka kugu
yidhi, ‘Sariirtaada qaado oo soco?" 13 Kii la
bogsiiyayse ma ogayn kuu yahay, waayo,
Yeshuuca wuu tagay maxaa yeelay dad badan
ayaa meeshaas joogeen. 14 Waxaas dabadeed
Yeshuuca ayaa isaga ka helay macbudka oo
wuxuu ku yidhi, "Eeg, waad bogsatay! Mar
dambe ha dembaabin si aanan wax ka sii xumi
kuugu dhicin." 15 Ninkii ayaa tagay, wuuna u
sheegay Yuhuuddii inuu ninkii bogsiiyey
Yeshuuca ahaa. 16 Sababtan awaadeed ayay
Yuhuuddu Yeshuuca u silciyeen, waayo,
wuxuu waxyaalahan sameeyay Sabtidii. 17
Laakiin Yeshuuca wuxuu ugu jawaabay:
"Aabbahay illaa hadda wuu shaqaynayaa,
aniguna sidoo kale waan shaqaynayaa."

## Yeshuuca wuxuu la siman yahay Ilaah

18 Sababtan aawadeed ayay Yuhuuddu aad u
sii dooneen inay dilaan, sababtu ma ahayn
Sabtida uu jebiyay keliya, laakiin waxay ahayd
inuu Ilaah ugu yeedhay Aabbihiis, iyo inuu
isagu Ilaah iskala mid dhigay.

# Awoodda Wiilka

[19] Markaasaa Yeshuuca ku yidhi iyaga: "Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Wiilku keli
ahaantiis waxba ma samayn karo, wuxuu arko
Aabbaha oo samaynaya mooyaane. Wax
kastoo isagu sameeyo Wiilkuna sidoo kale
wuu sameeyaa. [20] Waayo, Aabbuhu wuu
jecelyahay Wiilka, oo wuxuu tusaa waxyaalaha
uu isagu sameeyo oo dhan, wuxuuna tusi
doonaa shuqullo kuwan ka waawayn, si aad
idinku ula yaabtaan. [21] Sida Aabbuhu kuwa
dhintay u kiciyo oo u nooleeyo, sidoo kale
ayuu Wiilkuna u nooleeyaa kuwa uu doonayo.
[22] Aabbuhu ninna ma xukumo, laakiin xukunka
oo dhan wuxuu siiyay Wiilka, [23] si ay dadka oo
dhan u xushmeeyaan Wiilka siday Aabbaha u
xushmeeyaan. Kii aan Wiilka xushmeynin, ma
xushmeeyo Aabbaha, isaga soo diray. [24]
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii
eraygayga maqla oo rumaysta kii i soo diray,
wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah,
xukunna geli maayo, laakiin dhimashada ayuu
ka soo gudbay oo nolosha ayuu u soo gudbay.
[25] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay,
saacaddu waa imanaysaa, waana joogtaa,
markay kuwii dhintay codkii Wiilka Ilaah maqli
doonaan, oo kuwa maqlaana way noolaan
doonaan. [26] Siduu Aabbuhu nolol isugu
leeyahay, ayuu Wiilka u siiyay inuu nolol isugu
lahaado. [27] Wuxuuna siiyay amar uu wax ku
xukumo, maxaa yeelay, waa Wiilka Aadanaha.

28 Ha la yaabin tan, waayo, saacadu way
imanaysaa markay kuwa xabaalaha ku jiro
dhammaantood codkiisa maqli doonaan, 29
wayna ka soo bixi doonaan, kuwii wanaagga
falay ilaa u sarakicidda nolosha, kuwa sharka
falayna ilaa sarakicidda xukunka."

## Maragga Yeshuuca Loo Furo

30 "Keli ahaantayda waxba ma samayn karo.
Sidaan wax u maqlo ayaan u xukumaa,
xukunkayguna waa xaq, waayo, doonistayda
ma doono, laakinse doonista kii i soo diray. 31
Haddaan isu marag furo, maraggaygu run ma
aha. 32 Laakiin waxaa jira mid kale oo ii marag
fura, waanan ogahay in maragfurkiisa uu run
yahay. 33 Waxaad cid u soo dirteen Yooxanaa,
wuuna u marag furay runta. 34 Ma aha inaan u
baahanahay maragfurka binu aadanka, laakiin
waxyaahalan waxaan idiinku sheegay si aad u
badbaaddaan. 35 Wuxuu ahaa laambad
gubanaysa oo ifaysa, idinkuna waxaad
doonayseen inaad nuurkiisa muddo ku
faraxdaan. 36 Laakiin maraggaan leeyahay waa
ka weyn yahay kii Yooxanaa. Waayo,
shuqullada Aabbuhu i siiyay inaan
dhammeeyo, isla shaqooyinkaas aan
samaynayo, ayaa ii marag furaya in Aabbuhu i
soo diray. 37 Iyo Aabbihii i soo diray, isaga
laftiisu, wuu ii marag furay. Weligiinna codkiisa
ma aydaan maqlin mana aydaan arkin
qaabkiisa, 38 iyo eraygiisuna ma idinku dhex

jirin, waayo, kii uu soo diray ma aydaan rumaynin. 39 Qorniinka ayaad baadhaan, waayo, waxaad u malaynaysaan inaad gudihiisa nolosha weligeed ah ku leedihiin, waana iyaga kuwa ii marag fura, 40 iyo ma doonaysaan inaad ii timaaddaan si aad nolol u lahaataan. 41 Anigu dadka ammaan kama qaato. 42 Laakiin waan ogahay inaydaan gudihiina ku haysan jacaylka Ilaah. 43 Waxaan idiinku imid magaca Aabbahay, mana aydaan i aqbalin. Hadduu mid kale magiciisa ku yimaado, isaga ayaad aqbali doontaan. 44 Sidee baad u rumaysan kartaan, idiinkoo midkiinba midka kale ammaan iska helaya, oo aydaan raadinayn ammaanta ka timaadda Ilaaha kaliya?

45 Ha u malaynina inaan Aabbaha idinku ashkataynayo; kan idinku ashkataynaya waa Muuse, kan aad rajaynayseen. 46 Waayo, haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i rumaysan lahaydeen, waayo, aniga ayuu wax iga qoray. 47 Laakiin haddii aydaan rumaysan qoraaladiisa, sideed u rumaysan doontaan erayadayda?"

## Yeshuuca wuxuu Quudiyay Shan Kun

**6** Intaas dabadeed Yeshuuca wuxuu u kacay dhinaca kale ee badda Galili, oo ah badda Tiberiyas. 2 Hadda dad badan way raaceen

isaga, waayo, waxay arkeen calaamooyinkii uu
ku samaynayay kuwii bukay. 3 Ka dib
Yeshuuca buurta ayuu u baxay, oo halkaas
ayuu xertiisa la fadhiyay. 4 Hadda waxaa
dhowayd iiddii Kormaridda ee Yuhuudda. 5
Sidaas daradeed Yeshuuca isagoo indhihiisa
kor u qaaday oo arkay in dad badan ku soo
socdeen isaga, wuxuu Filibos ku yidhi,
"Xageen ka iibsannaa kibis si ay dadkanu u
cunaan?" 6 Iyo wuxuuna sidan ugu yidhi si uu
u imtixaamo isaga, waayo, Isaga qudhiisu wuu
ogaa wuxuu samayn lahaa. 7 Filibos wuxuu
ugu jawaabay: "Laba boqol oo diinaar oo ah
qiimaha kibis kuma filna iyaga si qof walba
wax yar u helo." 8 Mid ka mid ah xertiisa,
Andaros, Simoon Butros walaalkiis, ayaa ku
yidhi, 9 "Halkan waxaa jooga wiil haysta shan
xabo oo shaciir ah iyo laba kalluun, laakiin
sidee ayay ugu filnaan kartaa dadkan badan?"
10 Markaasuu Yeshuuca yidhi, "Dadka
fadhiisiya." Meeshaasina waxay lahayd caws
badan. Haddaba nimankii way fadhiisteen,
tiradooduna qiyaastii waxay ahayd shan kun. 11
Markaasuu Yeshuuca kibistii qaaday, oo
goortuu mahadnaqay ayuu u qaybiyay kuwii
fadhiyey. Sidaas oo kalena kalluunkii in alla
intay doonayeen. 12 Markay wada dhergeen,
wuxuu xertiisii ku yidhi, “Uruuriya jajabkii
hadhay, oo waxba yaanay ka lumin.” 13 Sidas
daraadeed way uruuriyeen, oo ay ka
buuxiyeen laba iyo toban dambiilood oo
jajabkii shantii xabbadood oo shaciirkii la
cunay ka hadhay. 14 Sidas daraadeed dadkii

markay arkeen calaamadii uu sameeyay, waxay yidhaahdeen, "Runtii, kanu waa nebigii dunida imaan lahaa." [15] Yeshuuca isagoo garanaya inay imaan doonaan inay qabtaan si ay boqor uga dhigaan, mar kale ayuu keligiis buurtii tagay.

## Yeshuuca wuxuu ku dul Socday Biyaha

[16] Markii fiidkii la gaadhay ayaa xertiisii badda tageen. [17] Kadib markay doonntii fuuleen, oo ka tallaabeen badda ilaa Kafarna'um. Oo mar hore gudcur ayay ahayd, Yeshuucna weli uma imaan. [18] Badduna way kacday waayo dabayl weyn ayaa dhacaysay. [19] Haddaba markay doontii wadeen qiyaastii afar ama shan kilomitir, waxay arkeen Yeshuuca oo badda ku soo dul socda oo doonnida ku soo dhowaanaya, wayna baqeen. [20] Laakiin wuxuu ku yidhi, "Waa aniga ee ha baqina." [21] Sidas daradeed waxay doonayeen inay doonnida ku qaadaan, oo isla markiiba doonnidii waxay gaadhay dhulkii ay u socdeen.

## Waxaan ahay Kibista Nolosha

[22] Maalintii ku xigtay dadkii badnaa oo badda dhankeeda kale taagnaa, waxay arkeen inaanay doonni kale joogin mid mooyee, oo aan Yeshuucna xertiisa la fuulin doonta, laakiin inay xertiisu keligood baxeen. [23] Laakiin waxaa

Tiberiyas ka yimid doonyo, oo waxay u soo
dhowaadeen meeshii kibista lagu cunay
markuu Rabbigu mahadnaqay dabadeed. 24
Markii dadkii badnaa arkeen inuusan
Yeshuuca iyo xertiisa halkaas joogin, iyaga
laftoodu waxay fuuleen dooniyihii yar yaraa,
wayna yimaaddeen Kafarna'um, iyaga oo
Yeshuuca doondoonaya.
25 Oo markay isaga ka heleen badda
dhinaceeda kale, waxay ku yidhaahdeen
"Macallinow, goormaad halkan timid?" 26
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay: "Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, Iima doondoontaan
calaamooyinkii aad aragteen aawadood laakiin
kibista aad cunteen oo aad ka dheregteen
aawadeed. 27 Ha u shaqaynina cuntada
kharaabaysa, laakiin cuntada sii jiraysa ilaa
nolosha weligeed ah ee Wiilka Aadanuhu idin
siin doono. Waayo, isaga Aabbaha Ilaaha ah
ayaa shaabadeeyey." 28 Sidaas aawadeed
waxay ku yidhaahdeen: "Maxaannu yeelnaa si
aannu shaqada Ilaah u samayno?" 29
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay: "Tani waa
shaqadii Ilaah: 'Waa inaad rumaysataan isaga
kii uu soo diray." 30 Sidaa darteed waxay ku
yidhaahdeen: "Maxaad Calaamad ahaan u
samaynaysaa si aan u aragno oo kuu
rumaysanno? Shaqadeed samaysaa? 31
Awoowoyaasheen waxay cidlada ku cuneen
maannada; sida loo qoray, 'Wuxuu samada ka
siiyey kibis si ay u cunaan." 32 Kadib Yeshuuca
ayaa ku yidhi, "Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Muuse samada idin kama siin

kibistii, laakiin Aabbahay ayaa samada idinka
siiya kibista runta ah. 33 Waayo, kibista Ilaah
waa kan ka soo degay samada oo dunida
nolosha siiya." 34 Markaasay ku yidhaahdeen:
"Rabbiyow, kibistan mar walba na sii." 35
Yeshuuca ayaa ku yidhi, "ANIGU WAXAAN
AHAY kibista nolosha. Kii ii yimaadda ma
gaajoon doono, kii i rumaystaana weligiis ma
harraadi doono. 36 Laakiin waxaan idiinku
sheegay inaad i aragteen, laakiin weli ma
aydaan rumaysan. 37 Kuwii uu Aabbuhu i siiyay
oo dhan way ii imaan doonaan, oo kii ii
yimaadda ma eryi doono. 38 Waayo, waxaan
samada uga soo degay ma aha inaan
doonistayda yeelo, laakiinse inaan yeelo
doonista kii i soo diray. 39 Tanu waa doonista kii
i soo diray, inaanan kuwii uu dhammaan i
siiyay midna ka lumin, laakiin inaan maalinta
ugu dambaysa soo sarakiciyo. 40 Waayo, tanu
waa doonistii Aabbahay, in mid kasta oo Wiilka
arka oo rumaysta uu nolosha weligeed ah
lahaado, Aniga Naftaydu maalinta ugu
dambaysa waan soo sarakicin doonaa isaga."

41 Sidaas aawadeed Yuhuuddii way
gunuunuceen, maxaa yeelay, wuxuu yidhi,
"ANIGU WAXAAN AHAY kibista samada ka
soo degtay." 42 Waxayna yidhaahdeen: "Kanu
miyaanu ahayn Yeshuuca, ina Yuusuf, kaannu
aabbihiis iyo hooyadiis naqaan? Marka siduu u
leeyahay, "Samada ayaan ka soo degay?" 43
Yeshuuca ayaa u jawaabay oo ku yidhi, "Ha
gunuunicina dhexdiinna. 44 Ninna iima imaan
karo hadduusan Aabbihii i soo diray soo jiidin,

aniguna maalinta ugu dambaysa ayaan soo
sarakicin doonaa. 45 Waxaa ku qoran
Nebiyada: "Kulligood Ilaah baa wax bari
doona." Mid kasta oo Aabbaha wax ka maqlay
oo ka bartay wuu ii yimaaddaa. 46 Ma aha in
qof Aabbaha arkay, kii Ilaah ka yimid
mooyaane, Isagaa Aabbaha arkay. 47 Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii rumaystaa,
wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah. 48
ANIGU WAXAAN AHAY kibista nolosha. 49
Awowayaashiin waxay cidlada ku cuneen
maannada, oo way dhinteen. 50 Tanu waa
kibista samada ka soo degtay, si qof u cuni
karo oo uusan u dhiman. 51 ANIGU WAXAAN
AHAY kibista nool ee samada ka soo degtay.
Haddii qof kibistan cuno, weligiis wuu noolaan
doonaa. Oo kibista aan siin doonaa nolosha
dunida aawadeed waa jidhkayga.”
52 Kadib Yuhuuddu way isla murmeen iyaga oo
leh, "Siduu ninkan jidhkiisa inoo siin karaa
inaannu cunno?" 53 Sidaas daraadeed
Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Haddaydaan jidhka Wiilka
Aadanaha cunin oo dhiiggiisa cabbin nolol
kuma lihidin dhexdiina. 54 Kii Jidhkayga cuna
oo Dhiiggayga cabba wuxuu leeyahay nolosha
weligeed ah, oo maalinta ugu dambaysa waan
soo sarakicin doonaa. 55 Waayo, Jidhkaygu
waa cunto run ah, iyo Dhiiggayguna waa
cabbitaan run ah. 56 Kii Jidhkayga cuna oo
Dhiiggayga cabba wuu igu jiraa, anna waan ku
jiraa isaga. 57 Sida Aabbaha nool ii soo diray
aniga, ayaan u noolahay Aabbaha dartiis,

sidoo kale kii i cunaa wuu u noolaan doonaa
aniga dartay. 58 Tanu waa kibista samada ka
soo degtay, mana aha sida kii awowayaashiin
cuneen oo ay dhinteen. Kii kibistan cuna,
weligiis wuu noolaan doonaa. 59 Waxyaalahaas
ayuu sunagogga dhexdiisa ku hadlay intuu
Kafarna’um wax ku barayay."

## Erayga Nolosha Weligeed ah

60 Sidaas daraadeed in badan oo xertiisa ah,
markay tan maqleen, waxay yidhaahdeen:
"Kan waa hadal adag. Yaa dhegaysan kara?"
61 Laakiin Yeshuuca qudhiisu isaga oo og in
xertiisu tan ka gunuunacayaan, ayuu ku yidhi,
"Tan ma idin turunturaynaysaa? 62 Ka warama
haddaad aragtaan Wiilka Aadanaha oo kor
ugu kacaya meeshuu markii hore joogay? 63
Waa Ruuxa kan nolosha bixiya, jidhkuna
faa’iido ma leh. Erayada aan idinkula hadlay
waa ruux iyo nolol. 64 Laakiin waxaa jira qaar
idinka mid ah oo aan rumaysan." Waayo tan
iyo bilowgii Yeshuuca wuu ogaa kuwa ay
ahaayeen kuwa aan rumaysan, iyo kii isaga
gacangelin lahaa. 65 Iyo wuxuu yidhi,
"Sababtan daraadeed waxaan idiinku idhi,
Qofna iima iman karo haddii uusan Aabbuhu u
ogolaan."
66 Sababtan daraadeed in badan oo ka mid ah
xertiisa dib ayay u noqdeen, oo mar dambe
lama ay socon isaga. 67 Sidaas daraadeed
Yeshuuca ayaa laba iyo tobankii ku yidhi,

"Idinkuna ma doonaysaan inaad tagtaan?" 68 Simoon Butros ayaa ugu jawaabay, “Sayidow, yaannu u tagnaa? Adigaa haya erayada nolosha weligeed ah, 69 annaguna waannu rumaysannay, oo waannu ognahay inaad tahay Kan Qudduuska ah ee Ilaah." 70 Yeshuuca ayaa ugu jawaabay: "Miyaanan idin dooran, labo iyo tobankiina, oo mid idin ka mid ah waa ibliis!" 71 Hadda wuxuu ka hadlay Yuudas Ina Simoon Iskariyod, waayo, isaguu ahaa kan gacangelin lahaa, isagoo laba iyo tobankii ka mid ah.

## Yeshuuca wuxuu tagay Iiddii Yuhuudda ee Waababka

**7** Waxyaalahan ka dib, Yeshuuca Galili ayuu ku dhex socdaalayay. Waayo, ma u doonaynin inuu Yahuudiya ku dhex socdo, maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay doonayeen inay dilaan. 2 Hadda Iidda Yuhuudda ee waababka way dhawayd. 3 Sidaas daraadeed walaalihiis waxay ku yidhaahdeen, "Halkan ka tag oo Yahuudiya aad si ay xertaadu u arkaan shaqadaada aad samaynaysid. 4 Qof si qarsoon wax u sameeyaa ma jiro markuu doonayo in si bayaan ah loo ogaado. Haddaad waxyaalahan samayso, dunida isu muuji." 5 Maxaa yeelay xitaa walaalihiis ma aysan rumaysan isaga. 6 Yeshuuca wuxuu ku yidhi iyaga, "Wakhtigayga weli lama gaadhin, laakiin

wakhtigiinna mar kasta waa la joogaa. 7
Dunidu idin ma nici karto, laakiin aniga way i
neceb tahay, waayo, waxaan ka marag furaa
in camaladeedu ay shar yihiin. 8 Idinku Iidda
taga, anigu Iid daan tagi maayo, waayo,
wakhtigaygii weli lama dhamaystirin." 9 Markuu
waxyaalahaan ku yidhi iyaga, wuxuu ku
nagaaday Galili.
10 Laakiin markay walaalihiis Iidda u kaceen,
kadib isaguna sidoo kale wuu u kacay, si cad
uguma kicin, laakiinse si qarsoodi ah ayuu u
tegay. 11 Sidaas daraadeed Yuhuudda ayaa
Iidda ka raadinayeen isaga, iyaga oo leh:
"Xagguu joogaa?" 12 Gunuunuc badan ayaa ka
jiray dadkii badnaa dhexdooda oo ku saabsan
isaga. Qaarkood waxay yidhaahdeen, "Waa
nin wanaagsan," qaar kalena waxay
yidhaahdeen, "Maya, laakiin dadka ayuu
khiyaameeyaa." 13 Laakiin qofna si cad isaga
ugama hadlin waayo waxay ka baqayeen
Yuhuudda.
14 Laakiin markay ahayd Iiddii dhexdeeda,
Yeshuuca wuxuu u kacay macbudka
gudhihiisa oo bilaabay inuu wax baro. 15 Marka
kadib Yuhuuddii ayaa la yaabeen, iyaga oo
leh: "Sidee ninkaan wax u bartay, isagoo
weligii wax baran?" 16 Sidaas daraadeed
Yeshuuca ayaa u jawaabay oo yidhi,
"Waxbariddayda igama iman, laakiin waxay ka
timid kii i soo diray. 17 Hadduu qof doonayo
inuu sameeyo doonista Ilaah, wuxuu garan
doonaa waxbaridda, haddii ay Ilaah ka timid
ama aan aniga iska hadlay. 18 Kii nafsadiisa ka

hadlaa, wuxuu doondoona ammaantiisa,
laakiin Kii doondoonaya ammaanta Kii isaga
soo diray, Isagu waa run, oo wax xaqdarro ah
kuma jirto Isaga. [19] Muuse sharciga miyuusan
idin siin? Mid idinka mid ah sharciga ma
sameeyo. Maxaad u doonaysaan inaad i
dishaan?" [20] Dadkii badnaa waxay ugu
jawaabeen: "Jinni baad qabtaa. Yaa doonayaa
inuu ku dilo?" [21] Yeshuuca ayaa u jawaabay,
"Hal shaqo ayaan sameeyay, dhamaantiina
waad la yaabteen. [22] Sababtan daraadeed
ayuu Muuse idiin siiyey gudniinta (ma aha in
ay ka timid Muuse, laakiin awowayaashii ayay
ka timid), idinkuna Sabtida ayaad nin guddaan.
[23] Haddii nin la gudo Sabtida, aanu sharciga
Muuse jabin doonin, ma waxaad iigu
xanaaqsan tihiin nin ayaan dhamaantiis
bogsiiyay Sabtida? [24] Muuqaalka wax ha ku
xukumina, laakiin wax ku xukuma xukunka
xaqa ah.

## Kanu Ma Masiix Baa?

[25] Sidaas daraadeed qaar ka mid ah reer
Yeruusaalem waxay yidhaahdeen, "Kani
miyaanu ahayn kan ay doondoonayaan inay
dilaan? [26] Oo bal eeg, wuxuu u hadlayaa si
bayaan ah, iyaguna waxba ma odhanayaan
isaga! Taliyayaashu runtii miyay og yihiin inuu
kani yahay Masiixa? [27] Laakiin waannu og
nahay ninkani meeshuu ka yimid, laakiin
goortuu Masiixu yimaado, ninna ma ogo

meeshuu ka yimid." 28 Kadib Yeshuuca
macbudka ayuu ka dhex qayliyay, isagoo wax
baraya oo leh, "Waad i taqaannaan, waanad
garanaysaan meeshii aan ka imid. Anigu
Qudhayda iskama imaan, laakiin Kan i soo
diray waa run, kan aydaan garanayn. 29 Anigu
waan aqaanaa isaga, waayo, isagaan ka imid,
wuuna i soo diray." 30 Sidaas daraadeed waxay
doonayeen inay qabtaan Isaga, laakiin ninna
gacanta ma saarin isaga, waayo, saacaddiisii
weli lama gaadhin. 31 Laakiin dad badan way
rumaysteen Isaga. Waxayna yidhaahdeen,
"Masiixu markuu yimaado miyuu samayn
doonaa calaamooyin ka badan kuwii ninkanu
sameeyay?"

## Saraakiil Loo Diray Inay Yeshuuca Soo Xidhaan

32 Farrisiintii waxay maqleen dadkii badnaa oo
ka gunuunacaya waxyaalahan ku saabsan
isaga, iyo wadaaddadii sare iyo Farrisiintii
waxay u direen saraakiil inay soo qabtaan
isaga. 33 Sidaas daradeed Yeshuuca wuxuu ku
yidhi, "Waayo in yar baan idinla joogayaa,
kadibna waxaan u tagayaa Kii i soo diray. 34
Waad i raadin doontaan laakiin ima heli
doontaan, meeshaan joogana ma imaan
kartaan." 35 Yuhuuddii qudhoodu waxay isku
yidhaahdeen: "Ninkan xaggee buu doonayaa
inuu tago oo aanaan ka heli doonin? Miyuu
doonayaa inuu u tago qurbajoogta ka mid ka

ah Giriigga oo wax baro dadka Gariiga ah? 36
Waa maxay eraygan uu yidhi, ‘Waad i raadin
doontaan, laakiin ima heli doontaan,’ iyo,
halkan joogana ma imaan kartaan?’

## Webiyada Biyaha Nool

37 Hadda maalintii u dambaysay Iidda, oo
ahayd maalintii ugu waynayd, Yeshuuca ayaa
istaagay oo qayliyay, isaga oo leh: "Haddii qof
harraadan yahay, ha ii yimaado oo ha cabbo.
38 Kii i rumaysta, sida Qorniinka yidhi,
calooshiisa waxaa ka soo qulquli doona
webiyo biyaha nool ah." 39 Hadda tan wuxuu
kaga hadlay Ruuxa oo ay kuwa isaga
rumaystay heli doonaan, waayo Ruuxa weli
lama siinin, maxaa yeelay Yeshuuca weli lama
ammaanin.

## Kala Qaybinta Dadka

40 Markay erayadiisa maqleen, dadka
qaarkood waxay yidhaahdeen, "Runtii kanu
waa Nebiga." 41 Kuwa kalena waxay
yidhaahdeen: "Kanu waa Masiixa." Weli kuwa
kalena waxay yidhaahdeen, "Maya, waayo
miyuu Masiixu ka imaan doona Galili? 42
Miyaanu Qorniinka sheegin in Masiixu ka
imaan doono farcanka Daa’uud iyo Beytlaxam,
tuulada Daa’uud ka yimid?" 43 Sidaas
daraaddeed waxaa dhacay kala qaybsanaan
dadka dhexdooda ah isaga daraadiis. 44 Qaar

ka mid ah iyaga waxay doonayeen inay qabtaan Isaga, laakiinse ninna gacmaha ma saarin Isaga.
45 Sidaas daraaddeed saraakiishii waxay u
yimaaddeen wadaaddadii sare iyo Farrisiintii,
oo waxay ku yidhaahdeen: "Maxaad u keeni
weydeen Isaga?" 46 Saraakiishii waxay ku
jawaabeen: "Sida ninkan u hadlay, ninna
waligii uma hadlin." 47 Sidaas daraaddeed
Farrisiintiina waxay ugu jawaabeen iyaga:
"Idinkana miyaa la idin soo khiyaanay? 48 Ma
jiro mid ka mid ah taliyayaasha ama Farrisiinta
oo rumaystay Isaga? 49 Laakiin dadkan badan
oo aan sharciga garanaynin way habaaran
yihiin." 50 Nikodemos, (kii markii hore Yeshuuca
u yimid, oo iyaga ka mid ahaa), wuxuu iyaga
ku yidhi, 51 "Sharcigeenu miyuu xukumaa nin
ilaa uu marka hore ka maqlo isaga uuna
ogyahay wuxuu samaynayo?" 52 Waxay ugu
jawaabeen: "Adigu ma reer Galili baad tahay?
Raadi oo arag ma jiro nebi laga soo saaray
Galili." 53 [Qof kasta gurigiisa ayuu aaday.

## Naagtii Sinada lagu Qabtay

**8** Laakin Yeshuuca wuxuu tegay Buur
Saytuun. 2 Aroortii hore ayuu mar kale
macbudka yimid, oo dadka oo dhan way u
imanayeen Isaga, oo wuu fadhiistay oo wax
baray Iyaga. 3 Culimmadii iyo Farrisiintii waxay
u keeneen naag sino lagu qabtay, oo
markaasay dhexdooda soo istaajiyeen iyada, 4

waxay ku yidhaahdeen Isaga: "Macallin,
naagtan waxaa lagu qabtay ficilka sinada. 5
Hadda Sharciga dhexdiisa, Muuse wuxuu na
amray inaan dhagaxeyno naagtaan oo kale;
Sidaas daraadeed adigu maxaad leedahay?" 6
Waxay u yidhaahdeen sidan inay tijaabiyaan
isaga, si ay u helaan sabab ay ku eedeeyaan.
Laakiin Yeshuuca intuu hoos fiiriyay ayuu
dhulka ku qoray fartiisa. 7 Laakiin markay sii
wadeen inay weyddiiyaan, isagoo istaagaya
wuxuu ku yidhi iyaga "Kii idinka mid ah oo aan
dembi lahaynu dhagaxa ugu horreeya ha ku
tuuro." 8 Mar kale ayuu foororsaday oo dhulka
wax ku qoray. 9 Iyagoo maqlay oo damiirkoodu
uu xukumay waxay bilaabeen inay u baxeen
mid mid, laga bilaabo odayaashii illaa kan ugu
dambeeya oo Yeshuuca keligiis ayaa hadhay
iyo naagtii dhexda taagnayd. 10 Yeshuuca wuu
istaagay (oo cidna ma arag naagtii mooyaane)
oo wuxuu ku yidhi iyada, "Naag yahay, iyagii
aaway kuwii ku eedeeynayay? Ninna kuma
xukumin?" 11 Waxay ku tidhi, "Ninna, Sayidow."
Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Aniguna sidoo kale
kuma xukumayo. Soco, hadda laga bilaabo
mar dambe ha dembaabin."

## WAXAAN AHAY Nuurka Dunida

12 Sidaas daraadeed Yeshuuca ayaa mar kale
la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, "ANIGU
WAXAAN AHAY nuurka dunida. Kii i soo
raaca, weligiis gudcurka kuma socon doono,

balse wuxuu lahaan doonaa Nuurka nolosha."
13 Sidaas daraadeed Farrisiintu waxay ku
yidhaahdeen: "Adigaa isu marag furaya,
maragaaguna run ma aha." 14 Yeshuuca ayaa
u jawaabay iyaga oo ku yidhi, "Xitaa haddaan
isu marag furo Anigu maragaygu waa run,
waayo waxaan garanayaa meeshaan ka imid
iyo meeshaan tegayo; laakiin idinku ma
garanaysaan meesha aan ka imid ama
meeshaan tegayo. 15 Idinku waxaad wax u
xukuntaan sida jidhka, anigu ninna ma
xukumo. 16 Haddaan xukumo, xukunkaygu waa
run, waayo, anigu keligay ma xukumo, laakiin
waa aniga iyo Aabbaha isoo diray. 17Xitaa
sharcigiina waxaa lagu qoray in marag furka
laba qof uu run yahay. 18 Waxaan ahay kan
qudhiisa isu marag fura, Aabbaha isoo dirayna
wuu ii marag furaa." 19 Sidaas daraadeed
waxay ku yidhaahdeen; "Aaway Aabahaa?"
Yeshuuca ayaa ku jawaabay: "Aniga iyo
Aabbahay midna ma garanaysaan. Haddaad i
garan lahaydeen, Aabbahayna sidoo kale
waad garan lahaydeen." 20 Hadalladaan ayuu
kaga hadlay meeshii khasnaddu tiil, intuu
macbudka wax ku barayay; iyo ninna ma
qaban isaga, waayo saacaddiisii weli ma iman.
21 Markaa kadib wuxuu ku yidhi iyaga, "Waan
tagayaa, waadna i raadin doontaan, waxaadna
ku dhiman doontaan dembiyadiinna.
Meeshaan tegayo ma iman kartaan." 22 Sidaas
daraaddeed Yuhuuddu waxay odhanayeen:
"Isagu miyuu is dili doonaa, waayo wuxuu
yidhi, ‘Meeshaan tegayo ma iman kartaan.’?” 23

Wuxuuna ku yidhi iyaga, "Waxaad ka soo
jeedaan hoos, aniguna waxaan ka soo jeeda
xagga sare. Idinku waxaad tihiin kuwa
dunidan, aniguna dunidan kama soo jeedo. [24]
Sidaas daraadeed waxaan idiin sheegay inaad
dembiyadiina ku dhiman doontaan. Waayo,
ilaa aad rumaysataan ANIGU WAAN AHAY,
dembiyadiina ayaad ku dhiman doontaan." [25]
Sidaas daraadeed waxay ku yidhaahdeen
Isaga: "Kumaad tahay?" Yeshuuca wuxuu ku
yidhi, "Maxaan idinku odhanayay ilaa bilowgii?
[26] Waxaan hayaa waxyaalo badan oon idinku
dhaho, idinkuna xukumo oo ku sabsaan idinka,
laakiin kan isoo diray waa run, oo waxyaalaha
aan ka maqlay isaga, kuwan ayaan u
sheegayaa dunida." [27] Iyagu ma ogayn inuu
kala hadlayay wax ku saabsan Aabbaha. [28]
Sidaas daraadeed Yeshuuca ayaa ku yidhi,
"Markaad Wiilka Aadanaha kor u qaaddaan,
markaas kadib waad ogaan doontaan ANIGU
WAAN AHAY, aniguna shakhsi ahaantayda
waxba uma sameeyo, laakiin waxaan ugu
hadlaa waxyaalahan sida Aabbuhu ii baray. [29]
Oo kan isoo diray ayaa ila jira. Keligay igama
tagin, waayo mar kasta waxaan sameeyaa
waxyaalaha raali geliya isaga." [30] Intuu
waxyaalahan ka hadlayay, dad badan ayaa
rumaystay isaga.

## Runtu Way Idin Xorayn Doontaa

[31] Sidaas daraadeed Yeshuuca wuxuu ku yidhi

Yuhuuddii isaga rumaysatay, "Haddaad
eraygayga ku sii jirtaan, runtii waxaad tihiin
xertayda. 32 Oo waxaad garan doontaan runta;
runtuna way idin xorayn doontaa." 33 Waxay
ugu jawaabeen: "Farcankii Ibraahim baanu
nahay weligeednna ninna nama addoonsan.
Sideed ku tidhi, ‘xor baad noqon doontaan?’
34 Yeshuuca ayaa ugu jawaabay: "Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, qof kasta oo dembi
falaa waa addoonka dembiga. 35 Addoonkuna
guriga kuma sii jiro weligiis; wiilku wuu jira
weligiis. 36 Sidaas daraadeed hadduu Wiilku
idin xoreeyo, runtii waxaad noqon doontaan
xor. 37 Waxaan garanayaa inaad farcankii
Ibraahim tihiin, laakiin waxaad doonaysaan
inaad i dishaan, waayo eraygaygu idinkuma
jiro. 38 Wixii aan Aabbaha la arkay ayaan ku
hadlaa, idinkuna waxaad samaysaan wixii aad
aabbihiin ka maqasheen."

## Idinku waxaad tihiin kuwo Aabbahood Ibliiska yahay

39 Markaasay u jawaabeen oo ku yidhaadheen
Isaga: "Aabaheen waa Ibraahim." Yeshuuca
ayaa ku yidhi iyaga, "Haddaad carruurtii
Ibraahim tihiin, shaqadii Ibraahim ayaad
samayn lahaydeen. 40 Laakiin hadda waxaad
doonaysaan inaad i dishaan, anoo ah nin runta
uu ka maqlay Ilaah idiin sheegay. Ibraahim
sidaan ma samayn. 41 Waxaad samaynaysaan
shaqooyinka aabbihiin." Waxay ku

yidhaahdeen isaga; "Annagu kuma aannu dhalan sino. Waxaan leenahay hal Aabbe oo ah Ilaah." [42] Yeshuuca ayaa ku yidhi iyaga, "Haddii Ilaah Aabbihiin ahaan lahaa, waad i jeclaan lahaydeen, waayo Ilaah baan ka imid oo waan jooga, waayo Anigu iskama iman, laakiin isagaa i soo diray. [43] Maxaad hadalkayga u fahmi weeydeen? Maxaa yeelay, eraygayga ma maqli kartaan. [44] Idinku waxaad tihiin kuwo Aabbahood yahay Ibliiska, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan doonista aabbihiin. Tan iyo bilowgiiba wuxuu ahaa gacan ku dhiigle, isaga runta kuma nagaado, waayo runta kuma jirto isaga. Markuu been ku hadlayo, wuxuu ka hadlaa dabeecadiisa, waayo isagu waa beenaale iyo aabbaha beenta. [45] Laakiin runta aan ku hadlo daraadeed ima aydaan rumaysan. [46] Midkee idiin ka mid ah ayaa dembi igu caddaynaya? Haddaan runta ku hadlo, maxaad ii rumaysan weydeen? [47] Kan Ilaah kuwiisa ka mid ah, wuxuu maqlaa erayada Ilaah. Sababtan daraadeed ma maqashaan, waayo kuwa Ilaah ma tihiin."

## Intaanan Ibraahim jirin, ANIGU WAAN AHAY

[48] Yuhuuddii ayaa u jawaabay oo ku yidhi isaga: "Miyaannan si sax ah u sheegin inaad tahay reer Samaariya oo aad jinni qabtid?" [49] Yeshuuca ayaa ku jawaabay, "Anigu jinn ma

qabo, laakiin Aabbahay ayaan sharfaa,
idinkuna ima sharaftaan. [50] Laakiin Anigu
ammaantayda ma raadiyo, laakiin waxaa jira
Mid raadiya oo xukuma. [51] Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, Haddii qof ereygayga
xajiyo, sinnaba weligiis dhimasho ma arki
doono." [52] Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen
Isaga: "Hadda waan ognahay inaad jinn qabto.
Ibraahim wuu dhintay iyo nebiyadii na sidoo
kale, idinkuna waxaad leedihiin, 'Haddii qof
eraygayga xajiyo, sinnaba weligiis dhimasho
uma dhadhamin doono.' [53] Adigu kama weynid
aabbaheen Ibraahim oo dhintay? Sidoo kalena
nebiyadii way dhintay! Yaad iska dhigaysaa?"
[54] Yeshuuca ayaa ku jawaabay: "Haddaan is
ammaano, ammaantaydu waxba ma aha; waa
Aabbahay kan i ammaana, kan aad leedihiin,
‘Isagu waa Ilaaheenna;’ [55] idinkuna ma
aydnaan garanaynin isaga, laakiin Anigu waan
garanayaa Isaga, oo haddii aan idhaahdo, 'ma
garanayo isaga,' waxaan noqonayaa beenaale
sida idinka oo kale, laakiinse waan garanayaa
isaga, eraygiisana waan xajiyaa. [56] Aabbihiin
Ibraahim wuu farxay inuu maalintayda arko,
wuuna arkay oo ku farxay." [57] Markaas
Yuhuuddii waxay ku dhaheen isaga: "Weli
konton sano ma jirtid, oo Ibraahim miyaad
aragtay?" [58] Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, intaan Ibraahim
jirin, ANIGU WAAN AHAY." [59] Sidaas
daraadeed waxay qaateen dhagxaan si ay u
tuuryeeyaan Isaga, laakiin Yeshuuca wuu is
qariyay oo ka tagay macbudka.

# Yeshuuca Wuxuu Bogsiiyay Nin Indho la’aan Ku Dhashay

**9** Markuu marayey, wuxuu arkay nin ilaa
dhalashadiisa indhoole ahaa. 2 Oo xertiisu
waxay weydiiyeen isaga, iyagoo leh,
“Macallimow, yaa dembaabay, ma ninkan ama
waalidkiis, inuu indhala’aan ku dhasho?" 3
Yeshuuca ayaa ku jawaabay, "Ninkan iyo
waalidkiis midna ma dembaabin, laakiin sidaan
waxay u ahayd in shaqooyinka Ilaah lagu
muujiyo isaga gudihiisa. 4 Waa inaanu
shaqayno shaqooyinka kan i soo diray inta ay
maalin tahay; habeen baa imanaya markaan
ninna shaqayn karin. 5 Intaan dunida joogo,
Waxaan ahay nuurka dunida." 6 Markuu sidaan
yidhi, candhuuf ayuu dhulka ku tufay oo
candhuuftii dhoobo ka sameeyay oo dhoobadii
wuxuu mariyey indhihiisii. 7 Oo wuxuu ku yidhi
isaga, "Bax oo ku maydho barkada Siloo’am"
(oo macnaheedu yahay: diray). Sidaas
daraadeed wuu tegay oo soo maydhay, wuuna
soo laabtay isagoo wax arkaya.
8 Sidaas daraadeed deriskii iyo kuwii markii
hore arki jiray isagoo tuugsada, waxay
yidhaahdeen, "Kan miyuusan ahayn kii fadhi
jiray oo tuugsan jiray?" 9 Qaar waxay
yidhaahdeen, "Waa isaga." Qaar kalena weli
waxay yidhaahdeen, “Maya, laakiin waa
isagoo kale." Wuxuu yidhi, “Waxaan ahay

isaga." 10 Sidaas daraadeed waxay isaga ku
yidhaahdeen, "Marka sidee indhahaaga loo
furay?" 11 Wuxuu ku jawaabay, "Ninka la
yidhaahdo Yeshuuca ayaa dhoobo sameeyay
oo indhahayga mariyey, wuxuuna igu yidhi,
“Tag Siloo’am oo ku maydho;” Sidaas
daraadeed markaan tegay, oo ku maydhay
waxaan helay arag." 12 Oo waxay ku
yidhaahdeen isaga, "Aaway isaga?" Wuxuu ku
yidhi, "Ma garanayo."
13 Waxay u geeyeen Farrisiinta ninkii
indhoolaha ahaan jiray. 14 Hadda waxay ahayd
Sabti maalintii Yeshuuca sameeyay dhoobada
oo furay indhihiisa. 15 Sidaas daraadeed
Farrisiintii mar kale waxay weyddiiyeen siduu
araggiisa ku helay. Markaasuu wuxuu ku yidhi
iyaga, "Dhoobo ayuu indhahayga mariyay, oo
waan maydhay, oo waan arkaa." 16 Sidaas
daraadeed qaar ka mid ah Farrisiinta waxay
yidhaahdeen, "Ninkan Ilaah kama iman, waayo
Sabtida ma dhawro." Laakiin qaar kale waxay
ku yidhaahdeen, "Sidee nin dembiile ah u
samayn karaa calaamooyinkan oo kale?" Oo
waxaa jiray kala qaybsanaan dhexdooda ah. 17
Sidaas daraadeed waxay mar kale ku
yidhaahdeen ninkii indhaha la’aa, "Maxaad ka
leedahay isaga, maadama indhahaaga uu
furay?" Wuxuu ku yidhi, "Waa nebi." 18
Markaas kadib Yuhuuddii ma rumayn inuu
indhoole ahaa oo uu arag helay, ilaa ay u
yeedheen waalidka kan araggiisa helay, 19 oo
waxay weydiiyeen iyaga oo leh, "Kan ma
wiilkiinnii baa, kan aad tidhaahdaan, wuxuu ku

dhashay indha la'aan? Marka sidee buu hadda
wax u arkaa?" [20] Sidaas daraadeed waalidkiis
waxay u jawaabeen oo ku dhaheen, "Waan
garanaynaa inuu kani yahay wiilkayagii, oo uu
indha la'aan ku dhashay, [21] laakiin sida uu
hadda wax ku arko, ma garanayno; ama kan
indhihiisii furay, ma garanayno. Isaga weydii;
Waa qaangaar, isaga iska hadli doona." [22]
Waalidkiis sidan waxay u yidhaahdeen,
sababta oo ah Yuhuudda way ka
cabsanayeen, waayo Yuhuuddu waxay mar
hore ku heshiiyeen in haddii qof qirto in
Yeshuuca yahay Masiixa, sunagogga laga
saaro. [23] Sababtan daraadeed waalidkiis
waxay ku yidhaahdeen, "Waa qaangaar, isaga
weydii."

[24] Sidaas daraadeed mar labaad waxay u
yeedheen ninkii indhaha la'aa oo waxay ku
yidhaahdeen isaga, "Ilaah ammaan sii; waan
garanaynaa in ninkan yahay dembiile." [25]
Kadib wuxuu ku jawaabay, "Inuu dembiile
yahay, ma garanayo; hal mid oo aan garanayo,
waa inkastoon indhoole ahaa, hadda wax
waan arkaa." [26] Markaasay ku yidhaahdeen
isaga, "Muxuu kugu sameeyay? Sidee buu
indhahaaga u furay?" [27] Wuxuu ugu jawaabay
iyaga, "Mar hore waan idiin sheegay, oo ma
aydaan dhegaysan. Maxaad u doonaysaan
inaad mar kale dhegaysataan? Idinkuna sidoo
kale miyaad doonaysaan inaad xertiisa
noqotaan?" [28] Oo way caayeen isaga oo ku
yidhaahdeen, "Adigu waxaad tahay xertiisa,
laakiin annagu waxaan nahay xertii Muuse. [29]

Waan ognahay in Ilaah la hadlay Muuse,
laakiin ninkan ma garanayno meeshuu ka
yimid." 30 Ninkii ayaa u jawaabay iyaga oo ku
yidhi, "Tan waa mid yaab leh, inaydaan
garanaynin meeshuu ka yimid, oo indhahayga
ayuu furay. 31 Waannu ognahay inuusan Ilaah
dhageysan dembiilayaasha; laakiin haddii qof
Ilaah ka cabsanayo oo doonistiisa sameeyo,
wuu maqlaa isaga. 32 Weligeed lama maqlin
qof indhaha u furay nin indhaha la'aan ku
dhashay. 33 Haddii ninkan uusan ka iman Ilaah,
waxba ma uu samayn karin." 34 Way u
jawaabeen isaga oo ku dhaheen, "Gabi
ahaantaaba waxaad ku dhalatay dembi, oo
miyaad wax na baraysaa?" Sidaas daraadeed
dibadda ayay u tuureen.
35 Yeshuuca ayaa maqlay inay dibadda u
tuureen, oo kadib markii uu helay, wuxuu ku
yidhi, "Wiilka Aadanaha ma rumaysantahay?"
36 Wuu u jawaabay oo ku yidhi, "Waa kuma
Isagu, Rabbiyow, si aan u rumeeyo isaga?" 37
Yeshuuca ayaa ku yidhi isaga, "Waad aragtay
isaga sidoo kalena waa kan kula hadlayaa." 38
Oo wuxuu ku yidhi, "Rabbiyow, waan
rumaysanahay." Wuuna caabuuday Isaga. 39
Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Xukun daraaddiis
ayaan dunidan u imid, si kuwa aan wax arag
wax u arkaan, oo kuwa wax arka u noqodaan
indhoolayaal." 40 Qaar ka mid ah Farrisiinta oo
la joogay isaga, waxay maqleen waxyaalahan,
oo waxay ku yidhaahdeen isaga, "Annagana
sidoo kale ma indhoolayaal ayaanu nahay?" 41
Yeshuuca ayaa ku yidhi iyaga, "Haddaad

indhoolayaal ahaan lahaydeen, dembi ma
lahaateen; laakiin hadda waxaad tidhaahdeen,
'Waan aragnaa,' dembiyadiinu way sii jiraan.”

## Waxaan Ahay Adhijirka Wanaagsan

**10** "Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay,
Kan aan xerada idaha albaabka ka soo gelin
laakiin meel kale ka soo fuulaa, isaga waa
tuug iyo waxdhace. 2 Laakiin kan albaabka ka
soo gala waa adhijiraha idaha. 3 Isaga albaab
ilaaliyuhu wuu ka furaa, oo iduhu way maqlaan
codkiisa, oo wuxuu ugu yeedha idahiisa
magacyadooda, oo dibadda ayuu u kaxeeyaa.
4 Markuu kuwiisa oo dhan dibadda u soo
saaro, wuu hor kacaa iyaga, iduhuna way
raacaan isaga maxaa yeelay way garanayaan
codkiisa. 5 Nin qalaadna weligood ma raaci
doonaan, laakiin way ka carari doonaan isaga,
waayo ma garanayaan codka midka qalaad." 6
Masaalkan Yeshuuca iyaga ayuu kula hadlay,
laakiin iyaga ma ay garanayn waxaa ay ahayd
waxaa u kula hadlay iyaga.

7 Haddaba Yeshuuca ayaa mar kale ku yidhi
iyaga, "Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay,
ANIGU WAXAAN AHAY albaabka idaha. 8
Dhamman kuwii hortay yimid waa tuugo iyo
budhcad, laakiin iduhu ma maqlin iyaga. 9
ANIGU WAXAAN AHAY albaabka, haddii qof
aniga xaggayga kasoo galo, waa la badbaadin
doonaa, oo wuu soo geli doonaa oo bixi
doonaa, daaqna wuu heli doonaa. 10 Tuugga
waxa keliya oo u yimaado waa inuu wax xado

oo dilo oo burburiyo. Anigu waxaan u imid si
ay nolol u lahaadaan oo nolol badan u
lahaadaan.
[11] ANIGU WAXAAN AHAY adhijirka
wanaagsan; adhijirka wanaagsan wuxuu
naftiisa u bixiyaa idaha. [12] Kan ah shaqaale la
soo kiraystay oo aan ahayn adhijirka, kaas oo
aan ahayn milkiilaha idaha, wuxuu arkaa
yeeyda oo soo socota, wuxuuna ka tagaa kana
cararaa idaha, kadibna yeeyda ayaa qabata
iyaga oo kala firdhisa, [13] waayo isagu waa
shaqaale la soo kiraystay oo idaha kama
fikirayo. [14] ANIGU WAXAAN AHAY adhijirka
wanaagsan; oo waan garanayaa kuwayga,
kuwayguna way i garanayaan, [15] sida Aabbuhu
ii garanayo, sidoo kale ayaan Aabbaha u
garanayaa; oo naftayda ayaan u bixiyaa idaha.
[16] Oo Ido kale ayaan leeyahay oo aan kuwa
xeradan ahayn. Sidoo kale waa inaan keeno
iyaga, oo way maqli doonaan codkayga;
waxaana jiri doono hal xer iyo hal adhijire. [17]
Sababtan daraadeed Aabbuhu wuu i
jecelyahay, maxaa yeelay naftayda ayaan
bixiyaa si aan mar kale u qaato. [18] Ninna
igama qaado, laakiin anigaa naftayda iska
bixiyo. Waxaan leeyahay awood aan ku bixiyo,
oo waxaan leeyahay awood aan mar kale ku
soo qaato. Amarkan waxaan ka helay
Aabbahay."
[19] Waxaa dhacay kala qaybsanaan Yuhuuda
dhexdooda ah hadalladan awaadeed. [20] Qaar
badan oo iyaga ka mid ah waxay yidhaahdeen,
"Jinn buu qabaa oo wuu waalan yahay;

maxaad u dhagaysanaysaan isaga?" [21] Qaar
kalena waxay yidhaahdeen, "Kuwan ma aha
erayada qof jinn qaba. Jinn miyaa indhaha u
furi karaa mid indha la’?"

## Aniga iyo Aabbaha mid baannu nahay

[22] Waxay ahayd Iidda Cusboonaysiinta oo ka
dhacday Yeruusaalem. Waxay ahayd jiilaal. [23]
Yeshuuca wuxuu dhex socday macbudka oo
ku taala Balbalada Sulaymaan. [24] Kadibna
Yuhuuddii waxay ku soo urureen isaga
hareerihiisa oo ku yidhaahdeen isaga, "Ilaa
goormaad shaki nagu sii wadi doontaa?
Haddaad Masiixa tahay, si cad noogu sheeg."
[25] Yeshuuca ayaa ugu jawaabay iyaga, "Waan
idiin sheegay, oo ma aydnaan rumaynin;
Shaqooyinka aan magaca Aabbahay ku
sameeyo, kuwan ayaa ii marag fura. [26] Laakiin
ma aydnaan rumaynin, maxaa yeelay kuma
dhex jirtaan idahayga. [27] Idahaygu codkayga
way maqlaan, oo waan garanayaa iyaga,
wayna i soo raacaan, [28] oo waxaan iyaga
siiyaa nolosha weligeed ah, oo sinaba
weligood uma halaagsami doonaan, oo ninna
iyaga gacantayda kama dafi doono. [29]
Aabbahay oo iyaga i siiyay ayaa dhammaan
ka weyn; oo ninna iyaga kama dafi karo
gacanta Aabbahay. [30] Aniga iyo Aabbuhu mid
baanu nahay."
[31] Yuhuuddu ayaa mar kale dhagaxyo soo

qaateen si ay u dhagxeeyaan. 32 Yeshuuca
ayaa ugu jawaabay iyaga, "Waxaan idinka
tusay shaqooyin badan oo wanaagsan xagga
Aabbahay; midkee baad igu
dhagxaynaysaan?" 33 Yuhuuddu waxay ugu
jawaabeen isaga, "Shaqo wanaagsan
awaadeed kuuma dhagxaynayno, laakiin Ilaah
aflagaadayn daraadeed, maxaa yeelay adiga
oo nin ah ayaad Ilaah iska dhigaysaa." 34
Yeshuuca wuxuu ugu jawaabay iyaga,
"Miyaanay ku qornayn Sharcigiina, 'Waxaan
idhi, ‘Idinku waxaad tihiin Ilaahyo.' 35 Hadduu
ugu yeedhay Ilaahyo kuwa Erayga Ilaah ku
yimid (oo Qorniinka lama jebin karo), 36 miyaad
ku leedihiin Isaga, kan Aabbuhu qudduus ka
dhigay oo dunida ku soo diray, 'Ilaah ayaad
aflagaadaynaysaa,' waayo waxaan idhi:
'Waxaan ahay Wiilka Ilaah?' 37 Haddaanan
samayn shaqooyinka Aabbahay, ha i
rumaysanina. 38 Laakiin haddaan sameeyo, in
kastoo aydnan i rumaysanin, shaqooyinka
rumaysta, si aad u garataan oo u fahamtaan in
Aabbuhu igu jiro, aniguna Aabbaha ku jiro." 39
Sidaas daraadeed waxay doonayeen inay mar
kale qabtaan isaga, laakiin wuu ka baxsaday
iyaga.

40 Oo mar kale ayuu Urdun shishadiisa tegay
ilaa meeshii Yooxaana markii hore ku
baabtiisayay, oo meeshaas ayuu ku nagaaday.
41 Oo dad badan way u yimaadeen isaga oo ku
yidhaahdeen, “Runtii Yooxaana calaamo ma
samayn, laakiin wax walba oo Yooxanaa ka
yidhi ninkan run ayay ahayd.” 42 Iyo dad badan

meeshaas way ku rumeeyeen isaga.

## Yeshuuca Wuxuu Sarakiciyay Laasaros

**11** Hadda waxaa jiray nin buko, Laasaros oo
ka soo jeeda Beytaniya, taas oo ah tuulada
Maryan iyo walaasheed Maarta. 2 Oo waxay
ahayd Maryan tan ku subkay Rabbiga cadar,
oo timaheeda cagihiisa ku tirtirtay, tan
walaalkeed Laasaros bukay. 3 Sidaas
daraadeed gabdhihii walaalaha ahaa ayaa u
soo diray Isaga, iyaga oo leh, "Rabbiyow, bal
eeg, kii aad jeclayd wuu bukaa." 4 Laakiin
markii Yeshuuca tan maqlay, wuxuu yidhi,
"Xanuunkan kan dhimashada ma aha, laakiin
waa ammaanta Ilaah daraadeed, si Wiilka
Ilaah loogu ammaano." 5 Hadda Yeshuuca wuu
jeclaa Maarta, walaasheed iyo Laasaros. 6
Sidaas daraadeed markuu maqlay inuu buko,
laba maalmood ayuu ku nagaaday meeshii uu
joogay. 7 Markaas kadib wuxuu xertii ku yidhi,
"Aan tagno Yahuudiya mar kale." 8 Xertii
waxay ku yidhaahdeen isaga, “Macalinow,
Yuhuuddu hadda waxay doondoonayeen inay
ku dhagaxeeyaan, oo miyaad mar kale
tagaysaa meeshaas?” 9 Yeshuuca ayaa ku
jawaabay, "Miyaanay jirin laba iyo toban
saacadood maalintii? Haddii qof socdo
maalintii ma turunturoodo, maxaa yeelay
wuxuu arkaa iftiinka dunidan. 10 Laakiin haddii

qof socdo habeenkii, wuu turunturoodaa,
maxaa yeelay iftiinka kuma jiro isaga." [11]
Wuxuu yidhi waxyaalahan, oo markaas kadib
wuxuu ku yidhi iyaga, "Saaxiibkeen Laasaros
wuu hurdaa, laakiin waan tegaa si aan u soo
kiciyo isaga." [12] Xertii waxay ku yidhaahdeen,
"Rabbiyow, hadduu hurdo wuu bogsan doona."
[13] Hadda Yeshuuca wuxuu ka hadlay
dhimashadiisa, laakiin iyagu waxay u
maleeyeen inuu ka hadlayo hurdada caadiga
ah. [14] Sidaas daraadeed Yeshuuca ayaa si cad
ugu yidhi iyaga, "Laasaros wuu dhintay, [15] oo
anigu waan faraxsanahay inaanan halkaas
joogin idinka daraadiin, si aad u rumaysataan;
laakin aan u tagno isaga." [16] Sidaas daraaded
Toomas, kan Didumos la yidhaahdo, wuxuu ku
yidhi xertii la socotay, "Annagana ina kaxeeya
si aan ula dhimano isaga."

## ANIGU WAXAAN AHAY Sarakicidda Iyo Nolosha

[17] Markuu Yeshuuca yimid, wuxuu ogaaday
inuu afar maalmood qabriga ku jiray. [18] Hadda
Beytaniya waxay u dhowayd Yeruusaalem, oo
qiyaastii laba dhiibic todobo kilomitir ayay u
jirtay; [19] Iyo qaar badan oo ka mid ah Yuhuudii
waxay u yimaadeen Maarta iyo Maryan, si ay
uga qalbi qaboojiyaan walaalkood. [20] Sidaas
daraadeed Maarta markay maqashay in
Yeshuuca imaanayo, waxay u tagtay Isaga si
ay ula kulanto, laakiin Maryan waxay fadhisay

guriga. 21 Kadibna Maarta waxay ku tidhi
Yeshuuca, “Rabbiyow, haddaad halkan joogi
lahayd, walaalkay ma dhiman lahayn. 22
Laakiin xitaa hadda waxaan garanayaa in wax
alla waxaad Ilaah waydiisato in Ilaah ku siin
doono." 23 Yeshuuca wuxuu ku yidhi iyada,
"Walaalkaa wuu sarakici doonaa." 24 Maarta
waxay ku tidhi Isaga, "Waxaan garanayaa inuu
mar kale soo kici doono sarakicidda maalinta
ugu dambaysa." 25 Yeshuuca ayaa ku yidhi
iyada, "ANIGU WAXAAN AHAY sarakicidda iyo
nolosha; Kii i rumaysta, wuu noolaan doonaa
xitaa hadduu dhinto, 26 oo qof kasta oo nool oo
i rumaysta sinnaba weligii uma dhiman doono.
Tan ma rumaysantahay?" 27 Waxay ku tidhi
Isaga, "Haah, Rabbiyow; waan rumaysanahay
inaad tahay Masiixa, Wiilka Ilaah, Midka
dunida imaanayo.”

## Yeshuuca Wuu Ooyay

28 Markay tidhi sidan, way tagtay oo
walaasheed u yeedhay, iyada oo qarsoodi ku
leh, "Macallinka wuu joogaa, wuuna kuu
yeedhayaa." 29 Iyada markay maqashay, si
degdeg ah ayay u kacday oo u tagtay isaga. 30
Yeshuuca weli ma iman tuulada dhexdeeda,
laakiin weli wuxuu joogay meeshii Maarta kula
kulantay isaga. 31 Markaas kadib Yuhuuddii
kuwii guriga la joogeen iyada oo qalbi
qaboojinayeen, markay arkeen in Maryan si
degdeg ah u kacday oo u baxday, way

raaceen, iyaga oo u malaynaya inay qabriga
tagayso si ay halkaas ugu soo baroorato. 32
Sidaas daraadeed markay Maryan timid
meeshuu Yeshuuca joogay, way aragtay Isaga,
oo waxay ku dhacday cagihiisa, iyadoo ku leh,
"Rabbiyow, haddaad halkan joogi lahayd,
walaalkay ma dhiman lahayn." 33 Sidaas
daraadeed markuu Yeshuuca arkay iyadoo
barooranaysa, sidoo kalena Yuhuuddii la
socotay iyada ay la barooranayso, si qoto
dheer ayaa ruuxiisa u qiiroday oo u
dhibtooday, 34 isagoo leh, "Xageed dhigteen
isaga?" Waxay ku yidhaahdeen Isaga,
"Rabbiyow, kaalay oo arag." 35 Yeshuuca wuu
ooyay. 36 Sidaas daraadeed Yuhuuddu waxay
yidhaahdeen, "Eeg siduu u jeclaa isaga." 37
Laakiin qaar ka mid ah waxay yidhaahdeen,
"Miyaan ninkan oo ah kan indhada u furay
ninkii indhaha la’aa sidoo kale ka dhawri karin
ninkan inuu dhinto?”

## Yeshuuca wuxuu kiciyey Laasaros

38 Sidaas daraadeed Yeshuuca oo mar kale sii
qoto dheer u qalbi xumaaday ayaa qabriga
yimid. Waxayna ahayd ***god buurta
hoosteeda ku yaala, oo dhagax ayaa la dul
dhigay. 39 Yeshuuca ayaa yidhi, "Dhagaxa ka
qaada." Maarta oo ahayd kii dhintay
walaashiis, waxay ku tidhi isaga, "Rabbiyow,
wakhtigan wuu urayaa, waayo wuxuu dhintay
afar maalin ka hor." 40 Yeshuuca ayaa ku yidhi

iyada, "miyaanan kuu sheegin in haddaad rumaysato aad arki doontid ammaanta Ilaah?"
41 Markaasay dhagaxii ka qaadeen. Kadib Yeshuuca ayaa kor eegay oo yidhi, "Aabbow, Waan kaaga mahadcelinayaa inaad i maqashay.
42 Waanna ogaa inaad mar kasta i maqashid, laakiin sababta dadka hareeraha taagan awaadeed ayaan sidan u yidhi, si ay u rumaystaan inaad i soo dirtay."
43 Markuu waxyaalahan yidhi, wuxuu ku dhawaaqay cod weyn, "Laasarosow, banaanka uu soo bax."
44 Ninkii dhintay ayaa banaanka uu soo baxay, isagoo gacmahiisa iyo lugihiisa ku duuduubanyihiin maro, wejigiisana ayaa ku duuduubay maro. Yeshuuca wuxuu ku yidhi iyaga, "Isaga ka fura oo sii daaya."

## Shirqoolkii In Yeshuuca Lagu Dilo

45 Sidaas daraadeed qaar badan oo Yuhuuddii ka mid ah oo u yimid Maryan, oo arkay wuxuu sameeyay, ayaa rumaystay isaga.
46 Laakiin qaar ka mid iyaga ayaa u tegay Farrisiintii, oo u sheegay waxyaalihii Yeshuuca sameeyay.
47 Sidaas daraadeed wadaaddadii sare iyo Farrisiintii ayaa isku soo ururiyay Sanhedrin oo waxay yidhaahdeen, "Maxaan samaynaa? Waayo ninkanu calaamooyin badan ayuu samaynayaa.
48 Haddaan sidan iskaga dhaafno, dhammaan way rumaysan doonaan isaga, oo dadka Roomanka way imaan doonaan oo qaadan doonaan meesheena iyo

qarankeena." [49] Laakiin mid iyaga ka mid ah,
Kayafas, oo ahaa wadaadka sare ee
sannadkaas, ayaa ku yidhi, "Waxba ma
garanaysaan [50] oo kama fikirtaan inay idiin
faa'iido badantahay in nin keliya dadka u
dhinto, oo aysan quruumaha oo dhan
baaba'in." [51] Hadda hadalkan isagu iskama
dhihin, laakiin isagoo ah wadaadkii sare ee
sannadkaas, wuxuu sii sheegay in Yeshuuca
qaranka u dhiman doono, [52] qarankii oo keliya
ma aha, laakiin si uu iskugu soo ururiyo si mid
ah carrurtii Ilaah ee kala firdhisan. [53] Sidaas
daraadeed laga bilaabo maalintaas ay
qorsheeyeen inay dilaan Isaga.

[54] Sidaas daraadeed mar dambe Yeshuuca si
cad uma dhex marin Yuhuudda, laakiin wuxuu
ka tagay meeshaas ilaa gobolka u dhow
cidlada, magaalada la odhan jiray Efrayim, oo
meeshaas ayuu la joogay xertiisa.

[55] Hadda Iiddii Kormaridda ee Yuhuudda waa
dhowayd, oo dad badan waxay ka tageen
gobolka oo u kaceen Yeruusaalem Iidda
Kormaridda ka hor si ay isku daahiriyaan. [56]
Markaas waxay raadinayeen Yeshuuca, oo
waxay isku yidhaahdeen intay macbudka dhex
istaageen, "Siday idiinla muuqataa? Ma
inuusan sinaba u iman doonin Iidda?" [57] Hadda
Wadaaddadii sare iyo Farrisiintii waxay
bixiyeen amar ah in hadduu qof og yahay halkii
joogo waa inuu uu soo warbixiyo iyaga, si ay u
qabtaan Isaga.

## Maryan waxay ku Subaktay Yeshuuca Beytaniya

**12** Sidaas daraadeed lix maalmood ka hor
Iidda kormaridda, Yeshuuca wuxuu yimid
Beytaniya, meeshuu Laasaroskii joogay, kan
Yeshuuca ka soo sarakiciyay dhimashada. 2
Sidaas daraadeed casho ayay halkaas ugu
sameeyeen Isaga, Maartana way adeegaysay,
Laasarosna wuxuu ka mid ahaa kuwa la
fadhiyay Isaga. 3 Maryan ayaa qaaday rodol
cadar ah oo naaradiin saafi oo qaali ah,
waxayna ku subaktay cagihii Yeshuuca, oo
timaheedii ayay cagihiisa ku tirtirtay. Oo Gurigii
waxaa ka buuxsamay udgoonkii cadarka. 4
Laakiin Yuudas Iskariyod, mid ka mid ah
xertiisa, (kan isaga gacangelin lahaa), ayaa
yidhi, 5 "Maxaa cadarkan loogu iibin waayay
saddex boqol oo dinaar, oo loo siin waayay
masaakiinta?" 6 Hadda sidan wuxuu u yidhi,
maa aha inuu daneeyo masaakiinta, laakiin
tuug inuu ahaa daraadeed, markuu hayay
sanduuqa lacagta, wuxuu ka qaadi jiray wixii
lagu riday. 7 Sidaas daraadeed Yeshuuca ayaa
yidhi, "Iska daaya iyada, si ay u kaydiso
maalinta aaskayga. 8 Waayo, masaakiintu mar
kasta way idinla joogaan, laakiin anigu mar
kasta idinlama joogi doono."

## Shirqoolkii lagu dilay Laasaros

9 Markaas kadib dadkii badnaa ee Yuhuuda
ahaa waxay ogaaadeen inuu meeshaas joogo.
Wayna yimaaddeen, uma iman Yeshuuca
aawadiis oo keliya, laakiin sidoo kale inay
arkaan Laasaros, kan uu kasoo sarakiciyay
dhimashada. 10 Laakiin sidoo kale wadaaddadii
sare waxay qorsheeyeen inay dilaan Laasaros;
11 maxaa yeelay, isaga daraadiis qaar badan
oo ka mid ah Yuhuuda way baxeen oo
Yeshuuca rumeeyeen.

## Galitaanka Guusha

12 Maalintii xigtay dad badan oo uu yimid Iiddii,
markay maqleen inuu Yeshuuca imaanayo
Yeruusaalem, 13 waxay qaateen laamahaa
geedaha timirta ah, oo waxay u baxeen inay la
kulmaan Isaga, iyagoo ku qayliyeen,
"Hoosanna! Waxaa barakaysan Kan magaca
Rabbiga ku imaanaya, xitaa boqorka Israa'iil."
14 Yeshuucana wuxuu helay dameer yar oo ku
fadhiistay, sida qoran,

> 15 *[1]"Ha cabsan, gabadhii Siyoonay;
> Bal eeg, Boqorkaagii wuu imaanayaa
> isagoo ku fadhiiya qayl dameer ah."

16 Ilaa bilowgii xertiisu waxyaalahan ma ay
fahmin; laakiin markii Yeshuuca la
ammaanmay kadib, markaasay xusuusteen in
waxyaalahan isaga laga qoray, oo
waxyaalahan isaga ay ku sameeyeen. 17

---

[1] Sekaryaah 9:9

sss
Sidaas daraadeed dadkii badnaa ee isaga la
joogay markuu Laasaros qabriga uga yeedhay
oo kasoo sarakiciyay dhimashada, waxay u sii
marag fureen isaga. [18] Sababtan daraadeed
sidoo kale dadkii badnaa way baxeen oo la
kulmeen isaga, maxaa yeelay waxay maqleen
inuu calaamadan sameeyay. [19] Sidaas
daraadeed Farrisiintii waxay isku yidhaahdeen,
"Waad aragtaa inaadan waxba faa'iidaynin;
eeg, dunidii oo dhan way raacday isaga."

## Gariigta qaar baa Yeshuuca doondoonay

[20] Haddaba kuwii Iidda u kacay inay
caabudaan, waxaa ku dhex jiray qaar Giriig ah.
[21] Waxay u yimaaddeen Filibos oo ahaa reer
Beytsayda ee Galili, oo waxay ku weydiyeen,
"Mudane, waxaannu doonaynaa inaannu
Yeshuuca aragno." [22] Markaasaa Filibos u
tegay oo Andaros u sheegay, oo haddana
Andaros iyo Filibos ayay tegeen oo ay
Yeshuuca u sheegeen. [23] Kolkaasaa Yeshuuca
wuxuu ugu jawaabay, "Saacaddii way gaadhay
inuu Wiilka Aadanuhu lagu ammaano. [24]
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, xabbad
sarreen ah haddaysan dhulka ku dhicin oo
dhimanin, keli bay ahaanaysaa, laakiin hadday
dhimato, midho badan ayay dhashaa. [25] Kii
noloshiisa jecel, wuu lumin doona, iyo kii
noloshiisa dunidan ku necebna, wuxuu haysan
doona nolosha weligeed ah. [26] Qofkii ii adeega,

waa inuu i raacaa; oo meeshaan jooga, adeegahayguna wuu joogi doonaa. Qof hadduu ii adeega, Aabbahaa wuu sharfi doona isaga.

## Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado

27 “Hadda naftaydu way murugsantahay, oo
maxaan idhaahdaa? Aabbow, saacaddan iga
badbaadi. Laakiin sababtan aawadeed ayaan
saacaddan u imid. 28 Aabbow, magacaaga
ammaan." Kadib cod ayaa samada ka yimid,
"Waan ammaanay, haddana waanan ammaani
doonaa." 29 Dadkii badnaa ag taageen oo
maqleen, oo waxay yidhaahdeen, "Waa
onkod." Kuwa kalena waxay yidhaahdeen,
"Malag baa la hadlay isaga." 30 Yeshuuca ayaa
ku jawaabay, "Codkan uma imanin aawaday,
laakiin wuxuu u yimid aawadiin. 31 Hadda waa
xukunkii dunidan; hadda amiirka dunidan
dibadda lagu tuuri doonaa. 32 Aniga markaan
dhulka kor layga qaado, waxaan dadka oo
dhan u soo jiidi doonaa xaggayga.” 33 Wuxuu
sidan u yidhi inuu tuso siduu u dhiman doono.
34 Haddaba dadkii badnaa waxay ugu
jawaabeen, "Waxaanu Sharciga ka maqalnay
in Masiixu weligii uu jiri doono. Sidee baad u
leedahay, 'Wiilka Aadanaha waa inuu kor loo
qaado?' Waa kuma Wiilka Aadanahan?" 35
Yeshuuca Haddaba ayaa ku yidhi, "Nuurka in
yar buu idinla jiraa. Socda intaad nuurka

haysataan, si aan gudcurku idin soo qaban. Kii gudcurka ku socda ma garanayo meeshuu u socdo. [36] Intaad nuurka haysataan, nuurka rumayaa, si aad noqotaan caruurtii nuurka."

## Rumaysad la'aanta Dadka

Yeshuuca markuu waxyaalahan yidhi, ayuu ka
tegay oo iska qariyay iyaga. [37] Inkastuu
calaamooyin badan ku sameeyay hortooda,
weli ma aysan rumaysan isaga, [38] si erayga uu
ku hadlay Nebi Ishacyaah loo fuliyo:

*[2]"Rabbiyow, yaa warkayagii rumaystay,
oo yaa gacanta Rabbiga loo muujiyay?"

[39] Sababtan daraadeed ayay rumaysan kari
waayeen, waayo, Ishacyaah ayaa haddana
yidhi,

[40] *[3]"Wuxuu tiray indhahooda,
Oo Wuxuu engejiyay qalbigooda,
si aysan indhahooda wax ugu arkin,
qalbigoodana wax uga fahmin,
oo u soo laaban,
oo waan bogsiin doona iyaga."

[41] Ishacyaah waxyaalahan ayuu yidhi, maxaa
yeelay, ammaantiisa ayuu arkay, wuuna ka
hadlay isaga. [42] Si kastaba ha ahaatee xitaa
qaar badan oo taliyayaasha ka mid ah way
rumaysteen Isaga, laakiin cabsida Farrisiinta

---

[2] Ishacyaah 53:1
[3] Ishacyaah 6:10

daraadeed ma ay qiran, si aan sunagogga looga saarin. [43] Waayo, waxay ammaanta Ilaah ka jeclaadeen ammaanta dadka.

## Yeshuuca wuxuu u yimid inuu badbaadiyo Adduunka

44 Yeshuuca ayaa ku qayliyay oo yidhi, "Kii i rumaystaa, ima rumaysto, laakiin wuxuu rumaystaa kan i soo diray. 45 Kii i arkaana, wuxuu arkaa kan i soo diray. 46 Waxaan dunida u imid sida iftiin oo kale, si qof kasta oo i rumaystaa uusan gudcurka ku sii jirin. 47 Qof hadduu erayadayda maqlo oo uusaan xajin, anigu ma xukumayo isaga; waayo, uma imaan inaan dunida xukumo, laakiin inaan dunida badbaadiyo. 48 Kii i diida oo aan erayadayda aqbalin; wuxuu haystaa Mid xukuma, erayga aan ku hadlay ayaa xukumi doona isaga maalinta uga dambaysa. 49 Waayo, anigu iskama hadlin, laakiinse Aabbaha laftiisa i soo diray, Wuxuu I siiyay amar- waxaan idhaahdo iyo waxaan ku hadlab. 50 Waanan garanayaa inuu amarkiisu yahay nolosha weligeed ah. Sidaas daraadeed, waxaanku hadlayaa, sidii Aabbuhu igu yidhi, sidaasaan ku hadlayaa.

## Yeshuuca Wuu Maydhay Cagaha Xertiisa

**13** Haddaba Iidda Kormaridda ka hor,

Yeshuuca wuu ogaa inay saacaddiisii timid uu
dunidan ka tagi lahaa ilaa Aabbaha, kuwiisa
dunida joogay ayuu jeclaa, ilaa dhamaadkii
ayuu jeclaa iyaga. 2 Cashada dhexdeeda,
Ibliisku durba ayuu galay qalbiga Yuudas
Iskariyod, ina Simoon, inuu gacangeliyo Isaga,
3 Yeshuuca wuu ogaa in Aabbuhu wax walba
gacantiisa u siiyay iyo inuu Ilaah ka yimid oo
Ilaah u laabanayo, 4 ayuu cashadii ka kacay oo
dharkiisii ayuu dhinac iska dhigay, oo tuwaal
ayuu qaatay oo guntaday. 5 Kadib, wuxuu biyo
ku shubay weel oo billaabay inuu xertiisa
cagaha u maydho oo ku tirtiro tuwaalkii uu
dhexda ku xidhaa. 6 Wuxuu u yimid Simoon
Butros, kii ku yidhi, "Sayidow, ma adigaa
cagahayga ii maydhaya?" 7 Yeshuuca ayaa
ugu jawaabay oo ku yidhi isaga, "Waxaan
samaynayo, hadda ma fahmaysid, laakiin
dabadeed waad fahmi doontaa." 8 Butros ayaa
ku yidhi isaga, "Weligaa cagahayga waa
inaadan maydhin." Yeshuuca ayaa ugu
jawaabay, "Haddaanan kuu maydhin, qayb
iguma lihid." 9 Simoon Butros wuxuu yidhi,
"Rabbiyow, cagahayga oo keliya ma aha,
laakiin sidoo kalena gacmahayga iyo
madaxaygana." 10 Yeshuuca ayaa ku yidhi
isaga, "Kii maydhan uma baahna inuu maydho
cagihiisa mooyaane, laakiin wuu nadiifsan
yahay, idinkuna waad nadiifsan tihiin, laakiin
dhammaantiin ma aha." 11 Waayo, wuu ogaa
kii isaga gacangelin lahaa. Sababtan
daraadeed ayuu u yidhi, "Dhammaantiin nadiif
ma wada tihiin."

12 Markuu cagahooda u maydhay, oo dharkiisa
qaatay, oo haddana fadhiistay, markaasuu ku
yidhi iyaga, "Ma garanaysaan waxaan idinku
sameeyay? 13 Waxaad iigu yeedhaan, Macallin
iyo Rabbi, oo waad ku saxan tihiin, waayo,
WAAN AHAY. 14 Marka haddaan cagaha idiin
maydhay anigoo ah Rabbiga iyo Macalinka,
idinkuna waa inaad sidaas oo kale cagaha isu
maydhaan. 15 Waayo, waxaan idin siiyay
tusaale, si aad u samaysaan sidaan idinku
sameeyay. 16 Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay: Addoon kama wayna sayidkiisa,
rasuulna kama wayna kan soo diray. 17
Haddaad waxyaalahan garanaysaan, waad
barakaysan tihiin haddaad sameysaan. 18
Idinka oo dhan kama hadlayo. Waan ogahay
kuwa aan doortay; laakiin si Qorniinka loo
fuliyo:

> *[4]'Kan kibistayda cuna ayaa cidhibtiisa
> iga kor qaaday.'

19 Hadda waxaan idiin sheegayaa intaanay
dhicin ka hor, si markay dhacaan aad u
rumaysataan WAXAAN AHAY ISAGII. 20 Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, ku alla kii
aqbala kan aan soo diray wuu i aqbalaa, kii i
aqbalaana wuxuu aqbalaa kan i soo diray."

## Midkiin ayaa i gacangelin doona

21 Yeshuuca goortuu waxyaalahan yidhi kadib,

---

[4] Sabuurradii 41:9

ayuu ruuxiisa ku dhibtooday oo wuu marag
furay oo yidhi, "Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, midkiin ayaa i gacagelin doona." 22
Xertiisi ayaa is fiiriyeen iyagoo aan hubin kii uu
ka hadlayay. 23 Waxaa jiray mid ka mid ah
xerta Yeshuuca oo ku jiray laabtiisa, kaas oo
Yeshuucu jeclaa. 24 Sidaas daraadeed Simoon
Butros ayaa calaamad u sameeyay isaga inuu
weydiiyo, “Waa kuma kan uu ka hadlayo?” 25
Isagoo sidii ugu tiirsan laabta Yeshuuca, ayuu
ku yidhi, "Sayidow, waa kuma?" 26 Yeshuuca
ayaa ugu jawaabay, "Waa kii aan siin doono
jabkan kibista ah markaan baaquliga quusiyo."
Haddaba markuu kibista quusiyay baaquliga
ayuu siiyay Yuudas Iskariyod ina Simoon. 27
Markuu kibista qaaday kadib, Shaydaan ayaa
dhex galay isaga. Sidaas daraadeed Yeshuucu
wuxuu ku yidhi isaga, "Waxaad samaynayso,
dhakhso u samee." 28 Xitaa kuwii la fadhiyay
midkoodna ma ogaan ujeedada uu ula hadlay
isaga. 29 Waayo, Yuudas ayaa kiishadii lacagta
hayay, sida darteed qaarkood waxay u
maleeyeen in Yeshuucu ku yidhi isaga, “Soo
iibi waxyaalaha aynu iidda u baahan nahay.”
ama masaakiinta wax sii. 30 Sidaas daraadeed
markuu jabkii kibistii qaatay, isla markiiba ayuu
baxay. Oo habeen bay ahayd.

## Amar Cusub

31 Haddaba markuu baxay, Yeshuuca wuxuu
yidhi, "Hadda Wiilka Aadanaha waa

ammaanmay, Ilaahna waa ku ammaanmay
Isaga. 32 Haddii Ilaah ku ammaanmay Isaga,
Ilaah wuu u ammaani doona Isaga qudhiisa,
oo isla markiiba wuu ammaani doonaa isaga.
33 Carruur yahay yaryari, in yar ayaan idin la
joogaa. Waadna i raadin doontaan, oo sidaan
Yuhuuddii ku idhi, ayaan idinku leeyahay,
‘Meeshaan tagayo, ma imaan kartaan. 34
Waxaan idin siinayaa amar cusub: Waa inaad
isu jeclaataan, sidaan idiin jeclaaday, idinkuna
sidoo kale waa inaad isu jeclaataan. 35 Sidaan
dadka oo dhan way garan doonaan inaad
xertayda tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan."

## Yeshuuca Wuxuu Sii Sheegay Butros Inuu Dafiri Doono

36 Simoon Butros ayaa ku yidhi, "Rabbiyow,
xaggeed tagaysaa?" Yeshuuca ayaa ugu
jawaabay, "Meeshaan tagayo, hadda ii ma
raaci kartid, laakiin hadhow waad i soo raaci
doontaa." 37 Butros ayaa ku yidhi, "Rabbiyow,
maxaanan hadda kuu raaci karin? Naftayda
ayaan u bixin doonaa adiga dartaa." 38
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Miyaad
naftaada aawaday u bixin doontaa? Runtii,
runtii, waxaan kugu leeyahay, saddex mar
ayaad i dafiri doontaa intuusan diiqu ciyin ka
hor.

## ANIGU WAXAAN AHAY Jidka iyo Runta iyo Nolosha

**14** "Qalbigiinnu yuusan murugoonin. Ilaah
rumaysta, anigana i rumaysta. 2 Guriga
Aabbahay wuxuu leeyahay qolal badan;
haddaanay sidaas ahayn, waan idiin sheegi
lahaa; waayo waan tagayaa si aan meel
idiinku sii diyaariyo. 3 Iyo haddaan tago oo
meel idiin diyaariyo, mar kale ayaan iman
doonaa oo xaggayga ayaan idiin qaadi
doonaa, si aad meeshaan joogo idinkuna aad
joogtaan. 4 Iyo meesha aan tegayo, jidka waad
garanaysaan." 5 Toomas ayaa ku yidhi,
"Sayidow, ma garanayno meeshaad tegayso.
Sideen ku garan karnaa jidka?" 6 Yeshuuca
ayaa ku yidhi isaga, "ANIGU WAXAAN AHAY
jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha
uma yimaado, inuu aniga isoo maro
mooyaane. 7 Haddaad i garan lahaaydeen,
Aabbahayna waad garan lahaydeen. Hadda
laga bilaabo waad garanaysaan isaga, waadna
aragteen isaga." 8 Filibos ayaa ku yidhi,
"Rabbiyow, Aabbaha na tus, waa nagu filan
yahay." 9 Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Ma anigoo
intaas oo dhan idinla joogay, oo weli miyaadan
i garanaynin Filibosow? Kii i arkay wuxuu
arkay Aabbaha. Sideed u tidhaahdaa,
'Aabbaha na tus?' 10 Miyaadan rumaysnayn
inaan Aabbaha ku jiro, oo Aabbuhuna igu jiro?
Erayadan idin kula hadlayo naftayda kama
hadlin, laakiin Aabbaha aniga igu dhex nool
ayaa shaqadiisa sameeya. 11 I rumayso inaan
Aabbaha ku jiro, Aabbuhuna aniga igu jiro,

ama haddii kale shaqooyinka aawadood igu
rumaysta. 12 Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, kii i rumaystaa, shaqada aan
sameeyo, sidoo kale wuu samayn doona; iyo
shaqooyin kuwan ka weyn wuu samayn
doonaa, maxaa yeelay Aabbahaan u tegayaa.
13 Wax alla waxaad magacayga ku
weydiisataan, tan waan samayn doonaa si
Aabbuhu ugu ammaanmo Wiilka. 14 Haddaad
wax igu weydiisataan magacayga, waan
samayn doonaa."

## Yeshuuca Wuxuu Ballanqaaday Ruuxa Qudduuska ah

15 "Haddaad i jeceshihiin, amarradayda waad
xajin doontaan. 16 Aniguna Aabbahaan weydiin
doonaa, oo wuxuu idin siin doonaa Gargaare
kale inuu idinla jiro weligiin; 17 Ruuxa runta ah,
kaas oo dunidu aanay aqbali karin, waayo ma
arkayso Isaga mana garanayso Isaga. Laakiin
idinku waad garanaysaan Isaga, waayo, wuu
idinla jiraa, oo wuuna idinku jiri doonaa.
18 Idiinkama tegi doono sida agoomo; waan
idiin imaan doonaa. 19 In yar ka dib dunidu mar
kale ima arki doonto, laakiin idinku waad i arki
doontaan; waayo waan noolahay, idinkuna
sidoo kale waad noolaan doontaan. 20
Maalintaas waxaad garan doontaan inaan
Aabbahay ku jiro, idinkuna igu jirtaan, oo
aniguna idinku jiro. 21 Kii amarradayda haysta
oo xajiya kaasu waa kan i jecel. Kan i jecelna

Aabbahay wuu jeclaan doona isaga, aniguna
waan jeclaan doona isaga, waana isu muujin
doonaa isaga." 22 Yuudas (ma aha Iskariyod)
ayaa ku yidhi isaga, “Rabbiyow, maxaa dhacay
oo aad naftaada noogu muujinaysaa oo aadan
dunida ugu muujinayn?” 23 Yeshuuca ayaa ugu
jawaabay, "Haddii qof i jecelyahay, eraygayga
ayuu xajin doonaa, oo Aabbahay ayaa jeclaan
doonaa isaga, waannu u imaan doonnaa, oo
deggankeena waannu la samayn doonnaa
isaga./oo isaga waa la joogi/noolan doonaa. 24
Kii aan i jeclayn, eraygayga ma xajiyo; iyo
erayga aad maqlaysaan Kayga ma aha, laakiin
waa ka Aabbaha i soo diray."
25 "Waxyaalahan ayaan idinkula hadlay intaan
idinla joogay. 26 Laakiinse Gargaaraha, Ruuxa
Qudduuska ah, kaasoo Aabbuhu magacayga
ku soo diri doono, wax walba ayuu idin bari
doonaa, oo wuxuuna idiin xusuusin doonaa
wax walba oo aan idiin sheegay. 27 Nabad
ayaan idiinka tegayaa, Nabadaydana waan
idin siinayaa, sida dunida u siiso anigu idin siin
maayo. Qalbigiinu yuusan dhibatoobin
yuusanna baqin. 28 Waad maqasheen inaan
idinku idhi, ‘Waan tegayaa, waanan idiin imaan
doonaa. Haddaad i jeclaan lahaydeen, waad
ku farxi lahaydeen, waayo Aabbahan u
tegayaa, maxaa yeelay Aabbuhu wuu iga
wayn yahay. 29 Hadda waxaan idiinku sheegay
intaanay dhicin ka hor, si markay dhacaan aad
u rumaysataan. 30 Mar dambe wax badan
idinlama sii hadli doono, waayo amiirka
dunidan ayaa imanayaa. Isaguna waxba

iguma laha; 31 laakiin si ay dunida u ogaato
inaan Aabbaha jeclahay, waxaan sameeyaa
wixii Aabbuhu igu amray. Kaca, aynu meeshan
ka tagnee.”

## ANIGU WAXAAN AHAY Geedka Canabka ah oo Runta ah

**15** "ANIGU WAXAAN AHAY geedka canabka
ah oo runta ah; Aabbahayna waa beerfalaha. 2
Laan walba oo igu taalla oo aan midho dhalin,
wuu ka saara; oo mid kasta oo midho dhasha,
wuu nadiifiyaa si ay midho ka sii badan u
dhasho. 3 Durba waad nadiifsan tihiin
eraygaan idinkula hadlay dartiis. 4 Igu jira, aan
idinku jiree. Sida laantu keligeed aanay midho
u dhali karin haddaanay geedka canabka ah
ku jirin, sidoo kale ma awoodaan haddaydaan
igu jirin. 5 ANIGU WAXAAN AHAY geedka
canabka ah, idinkuna waxaad tihiin laamihii. kii
igu jira oo aan ku jiro, midho badan ayuu
dhalaa, waayo la’aantay waxba ma samayn
kartaan. 6 Qof hadduusan igu jirin, waxaa loo
tuuraa sida laan oo kale, wuuna engagaa;
markaasaa la uruuriyaa, oo dabkaa lagu
tuuraa, oo la gubaa. 7 Haddaad igu jirtaan, oo
ay erayadayduna idinku jiraan, weydiista wax
alla wixii aad rabtaan, waana laydiin yeeli
doonaa. 8 Sidan ayaa Aabbahay loo
ammaanayaa inaad midho badan dhashaan
oo noqotaan xertayda. 9 Siduu Aabbuhu ii

jeclaaday, ayaan aniguna sidoo kale idiin
jeclaaday. Jacaylkayga ku sii jira. 10 Haddaad
amarradayda xajisaan, jacaylkayga ayaad ku
jiri doontaan; sidaan amarrada Aabbahay u
xajiyo oo aan jacaylkiisa ugu jiro. 11 Waxaan
waxyaalahan idiin ku sheegay in farxaddaydu
idinku jirto iyo inay farxaddiinu
dhammaystiranto.
12 Kanu waa amarkayga, waa inaad
isjeclaataan, sidaan idiin jeclaaday. 13 Jacayl
ka wayn qofna ma haysto, inuu qof naftiisa u
bixiyo saaxiibbadiisa. 14 Saxiibbaday baad
tihiin haddaad samaysaan waxaan idinku
amro. 15 Mar dambe adoommo idiinkuma
yeedhayo, waayo adoonku ma garanayo
wuxuu sayidkiisu sameeyo; laakiin saaxiibbo
ayaan idiinku yeedhay, waayo waxaan
Aabbahay ka soo maqlay oo dhan ayaan idin
muujiyay.
16 Idinku imaydaan dooranin laakiin anaa idin
doortay, oo idin diray si aad u tagtaan oo
midho u dhashaan, iyo inay midhihiinnu sii
jiraan, si wax alla waxaad Aabbaha
magacayga ku weydiisataan uu idin siiyo. 17
Waxyaalahan ayaan idiinku amray inaad
isjeclaataan."

## Neceybka Dunida

18 "Haddii dunidu idin nacdo, ogaada inay
idinka hortiin i nacday. 19 Haddaad kuwa
dunida ahaan lahaydeen, dunidu kuweeda way

jeclaan lahayd, laakiin kuwa dunida ma tihiin,
waanse idinka doortay dunida, sababtan
daraadeed ayay dunidu way idin neceb tahay.
[20] Xusuusta eraygaan idinku idhi: ‘Adoon kama
wayna sayidkiisa. Hadday i silciyeen, idinkana
way idin silcin doonaan; hadday eraygayga
xajiyeen, kiinana way xajin doonaan. [21] Laakiin
waxyaalahan oo dhan waxay idiinku samayn
doonaan Magacayga dartiis, waayo ma
garanayaan kii i soo diray. [22] Haddaanan
imaan lahayn oonan la hadli lahayn iyaga,
dembi ma ay lahaadeen, haddase cudurdaar
uma haystaan dembiyadooda. [23] Kii i naca,
sidoo kale wuxuu nacaa Aabahay. [24]
Haddaanan iyaga dhexdooda ku samayn
shaqooyinka aan cid kale samayn, dembi ma
ay lahaadeen; haddase aniga iyo Aabbahay
way na arkeen oo na naceen. [25] Laakiin tani
waxay u dhacday in la fuliyo erayga ku qoran
sharcigooda,

*[5]'Waxay i naceen sabab la’aan.'

[26] Laakiin markuu Gargaaruhu yimaado, oo
aan xagga Aabbaha idiinka soo diri doono,
Ruuxa runta ah oo ka soo baxa Aabbaha, wuu
ii marag furi doonaa. [27] Idinkuna sidoo kale
waad marag furi doontaan, waayo tan iyo
bilowgii waad ila joogteen."

**16** "Waxaan waxyaalahan idiinkula hadlay si
aydaan u dhicin. [2] Waxay idinka saari doonaan

---

[5] Sabuurradii 69:4

sunagogyada, laakiin saacad ayaa imaanaysa in mid walboo idin dilaa uu u malaynayo inuu Ilaah u adeegayo. [3] Waxay waxyaalahan u samayn doonaan, waayo ma garanayaan Aabbaha ama Aniga. [4] Laakiin waxaan waxyaalahan idiinkula hadlay si markay saacaddoodu timaado aad u xusuusataan inaan idin sheegay."

## Shaqada Ruuxa Qudduuska ah

"Tan iyo bilowgii waxyaalahan idiinma sheegin, waayo, waan idinla joogay. [5] Laakiin hadda waxaan u tegayaa kii i soo diray; midkiinna ima waydiin, 'Xaggeed tegaysaa?' [6] Waxyaalahan aan idiinkula hadlay aawadood, qalbigiina murug ayaa ka buuxsantay. [7] Laakiin runtii waxaan idinku leeyahay, way idiin faa'iido badan tahay inaan tago. waayo haddaanan tagin, Gargaaruhu idiinma imaan doono, laakiin haddaan tago, waan idiin soo diri doonaa isaga. [8] Isagu markuu yimaado wuxuu dunida ku xukumi doonaa dembiga iyo xaqnimada iyo xukunka; [9] xagga dembiga, waayo iyagu imay rumaysan; [10] xagga xaqnimada, waayo Aabbahaan u tagayaa oo mar dambe imana arki doontaan; [11] xagga xukunka, waayo amiirka dunidan waa la xukumay.

[12] Weli waxyaalo fara badan ayaan leeyahay inaan idiin sheego, laakiin ma awoodaan inaad qaadaan. [13] Laakiin Isagu markuu yimaado,

kaas oo ah Ruuxa runta ah, wuxuu idinku hoggaamin doonaa runta oo dhan, waayo isagu iskama hadli doono, wuxuuse ku hadli doona wuxuu maqlo, wuxuuna idiin muujin doonaa waxa imanaya. [14] Wuu i ammaani doonaa, waayo waxayga ayuu qaadan doonaa, wuuna idiin muujin doonaa. [15] Wax walboo Aabbuhu leeyahay anigaa leh; sidaas daradeed waxaan idhi; waxayguu qaadaa wuuna idiin muujin doonaa."

## Murugadaadu waxay Isu Baddali Doontaa Farxad

[16] "In yar kadib ima arki doontaan; mar kalena in yar ka dib waad i arki doontaan." [17] Sidaas daraadeed xertiisa qaarkood waxay isku yidhaahdeen, "Waa maxay waxan uu inagu leeyahay, 'In yar kadib ima arki doontaan, mar kalena in yar ka dib waad i arki doontaan,’ iyo, ‘maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa?' [18] Haddaba waxay yidhaahdeen, "Waa maxay waxan uu leeyahay, 'in yar kadib?' Ma garanayno wuxuu leeyahay." [19] Yeshuuca ayaa ogaaday inay doonayeen inay wax weyddiiyaan, oo wuxuu ku yidhi iyaga, "Miyaad is weyddiinaysaan wax ku sabsaan waxan idhi: ‘In yar kadib ima arki doontaan, mar kalena in yar kadib waad i arki doontaan?’ [20] Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, waad ooyi doontaan oo barooran doontaan, laakiin dunida way farxi doontaa. Waad murugoon

sss
doontaan, laakiin murugadiinna waxaa loo
bedeli doonaa farxad. 21 Haweenaydu markay
ilmo dhalayso way murugootaa, waayo
saacadeedaa timid, laakiin markay ilmo
dhasho, dhibtii dib uma xusuusato farxad
aawadeed, waayo ilmaa dunida ku dhashay. 22
Sidaas daraadeed idinkuna hadda waad
murugaysantihiin; laakiin mar kale ayaan idin
arki doonaa, qalbigiinuna wuu farxi doonaa,
farxaddiinana qofna idinkama qaadi doono. 23
Oo maalintaas waxba ima weydiin doontaan.
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Wax alla
waxaad Aabbaha ku weydiistaan magacayga;
wuu idin siin doonaa. 24 Ilaa hadda waxba
magacayga kumaydaan weydiisan; Weydiista
waadna heli doontaan si ay farxaddiinnu
buuxsanto."

## Dunida Waan Ka Adkaaday

25 "Waxyaalahan ayaan masaallo idiinkula
hadlay; Saacad ayaa imanaysa aanan mar
kale masaallo idinkula hadli doonin, laakiin si
cad ayaan idiinku sheegi doona wax ku
sabsaan Aabbaha. 26 Maalintaas waxaad ku
weydiisan doontaan magacayga, idinkuma lihi,
“Aabbahaan weydiin doona daraaddiin; 27
waayo Aabbaha qudhiisu wuu idin jecelyahay,
waayo waad i jeclaateen waadna rumaysateen
inaan Aabbaha ka imid. 28 Aabbaha ayaan ka
imid oo dunidan imid; haddana waan ka
tegayaa dunida oo Aabbahaan u tegayaa."

29 Xertiisa ayaa ku tidhi, "Bal eeg, hadda si cad
ayaad u hadlaysaa, oo masaallo ku hadli
maysid. 30 Hadda waannu ognahay inaad wax
walba garanysid, oo aadan u baahnayn qofna
inuu wax ku weydiiyo; sidaan ayaan u
rumaysanahay inaad Ilaah ka timid." 31
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Hadda ma
rumaysan tihiin? 32 Bal eega, saacad baa
imaanaysa, waana timid, markaad kala firdhi
doontaan, qof kasta gurigiisa, oo aad keligay
iga tegi doontaan. Laakiin aanan keligay
ahayn, waayo, Aabbaha ayaa ila jooga. 33
Waxyaalahan waxaan idiinku sheegay si aad
nabad igu dhex lahaataan. Dunidan dhib
ayaad la kulmi doontaan, laakiinse
kalsoonaada, waayo dunida waan ka
adkaaday."

## Ducada Wadaadka Sare

**17** Kadib markii Yeshuuca yidhi
waxyaalahan, wuxuu indhihiisii kor u qaaday
samada oo yidhi, "Aabbow, saacaddii way
timid. Ammaan Wiilkaaga si uu Wiilku ku
ammaano, 2 waayo waxaad isaga siisay amar
dadka oo dhan ugu sarreeya si uu nolosha
waligeed ah u siiyo kuwaad isaga siisay oo
dhan. 3 Tanu waa Nolosha weligeed ah, inay
ku gartaan Ilaah runta ah ee keliya iyo
Yeshuuca Masiix kii aad soo dirtay. 4 Dhulka
waan kugu ammaanay, oo waan dhameeyay
shaqadii aad ii siiysay inaan sameeyo. 5

Haddaba, Aabbow, hortaada igu ammaan, ammaanta aan kula lahaa intaan dunidu jirin
ha hor. [6] Waxaan magacaaga u muujiyay dadkii aad dunida iga siisay. Kuwaagii bay ahaayeen oo waad i siisay, wayna eraygaaga
xajiyeen. [7] Hadda waxay garanayaan wax
walba aad i siisay inay adiga ka yimaadeen. [8]
Waayo, waxaan iyaga siiyay erayga aad i siisay oo wayna aqbaleen. Runtii way garteen inaan xaggaaga kaa imid, oo wayna rumaysateen inaad i soo dirtay.
[9] Waan u duceynayaa iyaga. Dunida uma duceynayo, laakiin waxaan kuu duceynayaa
kuwaad aniga i siisay, waayo, waa kuwaagii. [10]
Kuwayga oo dhan adigaa leh oo kuwaaga
anigaa leh, waa layga ammaanaa iyaga. [11]
Anigu dunida ma sii joogayo, laakiin waxay joogaan dunida, oo anigu waan kuu imaanayaa. Aabbe Qudduusow, iyaga ku ilaali magacaagii, kaasoo aad i siisay, si ay mid u ahaadaan sidaa aan annagu baa mid u nahay.
[12] Intaan iyaga la joogay, waxaan iyaga ilaaliyay magacaagii aad i siisay. Waanan ilaaliyay oo midna ma lumin, wiilka halaagga
mooyaane, si ay Qorniinka la fuliyo. [13] Hadda
waan kuu imaanayaa, oo waxyaalahan ayaan ku hadlayaa intaan dunida joogo si ay
farxaddayda naftoodu ku buuxsadaan. [14]
Waxaan iyaga siiyay eraygaaga, oo dunidu way nacday iyaga, waayo, iyagu kuwa dunida ma aha, sida aanan anigu kan dunida u ahayn.
[15] Ducadeydu ma aha inaad iyaga dunida ka saartid, laakiin inaad ka ilaaliso kii sharka leh.

[16] Iyagu kuwa dunida ma aha, sida aanan
anigu kan dunida u ahayn. [17] Iyaga quduus
kaga dhig runta, eraygaagu waa run. [18] Sidaad
dunida iigu soo dirtay, ayaan iyaga dunida ugu
diray. [19] Iyaga dartood ayaan qudduus iskaga
dhigaa, si ay iyaguna xagga runta quduus
lagaga dhigo.
[20] Kuwan oo keliya uma ducaynayo, laakiin
kuwa igu rumaysan doona farrintooda
aawadeed, [21] inay dhammaantood mid u
ahaadaan, sidaad adigu Aabbow iigu jirto,
aniguna aan kuugu jiro, inay iyaguna nagu
jiraan, si ay dunidu u rumaysato inaad i soo
dirtay. [22] Waxaan iyaga siiyay ammaantaad i
siisay, inay mid u ahaadaan sidaynu mid u
nahay. [23] Iyaga aan ku jiraa, adiguna igu jirtaa,
inay si qumman u midoobaan, si ay dunidu
ogaato inaad i soo dirtay iyo inaad iyaga u
jeclaatay sidaad ii jeclaatay. [24] Aabbow,
waxaan doonayaa in kuwii aad i siisay inay ila
joogaan meeshaan joogo, si ay arkaan
ammaantayda aad i siisay, waayo, waxaad i
jeclaatay intaan dunida la aasaasin ka hor. [25]
Aabbaha xaqa ahow, inkastoo dunidu aysan
ku garanaynin, anigu waan ku garanayaa;
kuwanna waxay garanayaan inaad i soo dirtay.
[26] Magacaaga ayaan iyaga u muujiyay, oo
waan sii wadi doona inaan muujiyo, si ay
jacaylkii aad i jeclaatay iyaga ugu jiro, oo aan
aniguna iyaga ugu jiro."

## Yeshuuca Waa La Gacangeliyay oo

sss

# La Qabtay

**18** Yeshuuca markii waxyaalahan yidhi, ayuu
xertiisa la tagay oo kala gudbay Dooxada
Qidroon, meesha beer ku taal, isaga iyo
xertiisii ayay galeen. [2] Yuudasna, kii isga
gacagelin lahaa, meeshaas wuu garanayay,
waayo, Yeshuuca marar badan ayuu
meeshaas xertiisa kula kulmi jiray. [3] Haddaba
Yuudas wuxuu helay askar iyo saraakiil ka
yimaadeen wadaaddada sare iyo Farrisiinta.
Meeshaas waxay yimaadeen oo wadeen
faynuusyo iyo tooshyo iyo hub. [4] Yeshuuca oo
ogaa waxa ku dhici doona oo dhan, ayuu
baxay oo ku yidhi iyaga, "Yaad raadinaysaan?"
[5] Waxay ugu jawaabeen, "Yeshuuca reer
Naasared." Markaas Yeshuuca ayaa ku yidhi,
"ANIGA WAXAAN AHAY." Yuudas, kii
gacangeliyay isaga, wuu la taagay iyaga. [6]
Markuu Yeshuuca yidhi, "ANIGA WAXAAN
AHAY" dib bay u gurteen oo dhulka ayay ku
dhaceen. [7] Mar labaad ayuu waydiiyay iyaga,
"Yaad raadinaysaan?" Oo waxay ku
yidhaahdeen, "Yeshuuca reer Naasared." [8]
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Waan idiin
sheegay inaan isagii ahay. Haddaba, haddaad
i raadinaysaan, nimankan iska daaya.” [9] Tan
waxay ahayd inuu fuliyo eraygii uu ku hadlay,
'Kuwii aad i siisay, midna igama lumin.'

[10] Markaas ayaa Simoon Butros oo seef ayuu
haystay sooo baxsaday oo dhuftay wadaadkii
sare adeegihiisii oo ka gooyay dhegtiisa

midigta ah. (Adeegaha magiciisu wuxuu ahaa
Malkos.) 11 Yeshuuca ayaa Butros ku yidhi,
"Seeftaada galkeeda ku celi! Miyaanan ka
cabaynin koobka Aabbaha i siiyay?"

## Yeshuuca Wuxuu Wajahay Annas iyo Kayafas

12 Haddaba askartii iyo taliyahoodii iyo
saraakiishii Yuhuudda ayaa Yeshuuca qabteen
oo xireen. 13 Waxayna marka hore u geeyeen
Annas, waayo, wuxuu ahaa soddoggii Kayafas
oo ahaa wadaadkii sare ee sanadkaas. 14
Kayafas wuxuu ahaa kii ku taliyay Yuhuudda
inay u roonaan lahayd inuu hal nin u dhinto
dadka.

## Butros Baa Dafiray Yeshuuca

15 Simoon Butros iyo xer kale ayay daba
raaceen Yeshuuca. Waayo xertaas wadaadka
sare waa garanayay sidaa darteed ayuu la
galay Yeshuuca barxadda wadaadkii sare. 16
Laakiin Butros ayaa istaagay dibadda
albaabka agtiisa. Xertii kale oo la garanayay
wadaadkii sare ayuu dibadda soo baxay oo la
hadlay tii albaabka ilaalinaysay, taas oo butros
u keentay gudaha. 17 Gabadhii albaabka
ilaalinaysay waxay Butros ku tidhi, "Adigu
miyaadan ahayn mid ka mid ah xertii ninkan?"
Wuxuu ku yidhi, "Ma ihi." 18 Hadda
adeegayaashii iyo saraakiishii ayaa dab dhuxul

sameeyeen, waayo, qabow bay ahayd, wayna istaagayeen oo isku kulaalayeen. Butrosna wuu la joogay iyaga, isagoo taagay oo dabka isku kulaalayay.

## Wadaadka Sare ayaa Su'aalo Weydiiyey Yeshuuca

[19] Wadaadkii sare ayaa Yeshuuca wax ka weyddiiyay xertiisii iyo waxbariddiisii. [20]
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Si cad ayaan dunida ula hadlay. Mar walba waxaan ku barayay sunagogyada iyo macbudka, meeshii ay Yuhuudda oo dhan wada yimaadeen.
Waxba si qarsoon uma hadlin. [21] Maxaad i
waydiinaysaa? Weyddii kuwa i maqlay. Runtii
way garanayaan waxaan idhi." [22] Markuu
waxyaalahan yidhi, mid ka mid ah saraakiishii oo ag taagnaa ayaa Yeshuuca dharbaaxay. Markaas ayuu ku yidhi, "Sidan miyaad
wadaadka sare ugu jawaabaysaa?" [23]
Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Haddaan wax khaldan ku hadlay, khaladka ka marag fur; laakiin haddaan sax ku hadlay, maxaad ii
dhufanaysay?" [24] Haddaba Annas ayaa isaga
u diray Kayafas wadaadka sare isagoo weli xidhan.

## Butros Mar Labaad Wuu Dafiray Yeshuuca

25 Hadda Simoon Butros ayaa istaagay oo isku
kulayliyay. Waxay ku yidhaahdeen isaga,
"Adigu miyaadan ahayn mid ka mid ah
xertiisa?" Wuxuu inkiray oo yidhi, "Ma ihi." 26
Laakiin mid adeegaha ee wadaadkii sare, oo
qaraabo u ahaa ninkii Butros uu dhegta ka
gooyay wuxuu yidhi, "Miyaanan beerta kula
arkin isaga?" 27 Haddaba Butros mar kale ayuu
diiday oo isla markii diiqii ayaa ciyay.

## Yeshuuca Bilaatos hortiisa

28 Haddaba Yeshuuca way ka kaxeeyeen
Kayafas ilaa gudoomiyaasha maxkamada.
Subax bay ahayd. Iyagu ma ay gelin
gudoomiyaasha maxkamada si aysan u
nijaasoobin, waayo waxay doonayeen inay
Iidda Kormaridda wax ka cunaan. 29 Haddaba
Bilaatos ayaa soo baxay oo ku yidhi iyaga,
"Maxaad ku eedaynaysaan ninkan?" 30 Waxay
ugu jawaabeen, "Ninkan haddii uusan xumaan
fale ahayn, kuuma aannu dhiiban lahayn." 31
Haddaba Bilaatos wuxuu ku yidhi, "Idinku
laftiina qaada isaga, oo sharcigiinna ku
xukuma." Yuhuuddii waxay ku yidhaahdeen,
"Xalaal ma aha inaan qof dilno." 32 Kanu waxay
ahayd inaa loo fuliyo erayga Yeshuuca ku
hadlay, sii loo tuso nooca dhimashada uu
dhiman doono.

## Boqortooyadaydu ma aha mida dunidan

[33] Haddaba Bilaatos ayaa soo laabtay
gudoomiyaasha maxkamada, oo Yeshuuca u
yeedhay oo ku yidhi, "Ma waxaad tahay
Boqorka Yuhuudda?" [34] Yeshuuca ayaa ugu
jawaabay, "Ma Adigaa iska yidhi sidan, mise
kuwa kale miyaa kuu sheegay aniga?" [35]
Bilaatos ayaa ugu jawaabay, "Ma Yuhuudi
baan ahay? Qarankaaga iyo wadaaddada sare
ayaa ii kaa soo gacangeliyeen. Maxaad
sameysay?" [36] Yeshuuca ayaa ugu jawaabay,
"Boqortooyadaydu tan dunidan ma aha. Haddii
boqortooyadaydu tan dunidan ahaan lahayd,
adeegayaashayda ayaa dagaalami lahaa si
aysan Yuhuudda ii gacangeliyaan. Laakiin
boqortooyadaydu tan dunida ma aha." [37] Sidaa
darteed Bilaatos ayaa ku yidhi, "Marka waxaad
tahay boqor." Yeshuuca ayaa ugu jawaabay,
"Waxaad tidhaahdaa, waxaad tahay boqor.
Sababtaan awaadeed ayaan u dhashay oo
dunida u imid, si aan runta ugu marag furo.
Mid kasta oo kii runta ah wuu maqlaa
codkayga." [38] Bilaatos ayaa ku yidhi, "Waa
maxay runtu?"
Hadaladaan kadib wuxuu dibadda u baxay oo
ku yidhi Yuhuudda, "Eed isaga kuma helin." [39]
Laakiinse waxaad leedihiin caado inaan mid
idiin sii daayo Iidda Kormaridda. Haddaba ma
doonaysaan inaan idiin sii daayo Boqorka
Yuhuudda?" [40] Markaasay qayliyeen iyagoo
leh, "Ninkan ma aha, laakiin Baraabbas."
Hadda Baraabbas wuxuu ahaa tuug.

# Yeshuuca Waxaa loo Dhiibay in Iskutallabta lagu Qodbo

**19** Kadibna Bilaatos wuxuu qaatay Yeshuuca
oo karbaashay isaga. 2 Askartiina waxay
maroojiiyeen taaj qodaxyo oo madaxiisa u
saareen oo dhar guduudan way u xireen. 3
Way u yimaadeen oo ku yidhaahdeen, "Farxa,
Boqorka Yuhuuddow." Oo wayna dharbaaxeen
wejiga. 4 Haddana Bilaatos dibadda u soo
baxay oo ku yidhi iyaga, "Eeg, ayaan dibadda
idiin keeenayaa isaga si aad u ogaataan
inaanan wax eed ah ku helin." 5 Sidaa darteed
Yeshuuca dibaada u soo baxay isagoo taajkii
qodxanta xidhan iyo dharkii guduudnaa.
Bilaatos ayaa ku yidhi iyaga, "Bal eega ninka!"
6 Markay wadaadadii sare iyo saraakiishii
arkeen, waxay ku qayliyeen, "Iskutallaabta ku
qodob, iskutallaabta ku qodob!" Bilaatos ayaa
ku yidhi, "Idinku laftiina qaata isaga oo
iskutallaabta ku qodba, waayo, anigu wax eed
ah kuma helin." 7 Yuhuuddii ayaa ugu
jawaabtay, "Sharci waxaanu leenahay, oo sida
sharcigaas waa inuu dhinto, waayo, wuxuu
iska dhigay Wiilka Ilaah." 8 Markuu Bilaatos
eraygan maqlay, aad ayuu u sii cabsaday. 9
Wuxuu mar kale galay gudoomiyaasha
maxkamada oo ku yidhi Yeshuuca, "Xaggeed
ka timid?" Laakiin Yeshuuca ma u jawaabin. 10
Sidaa darteed Bilaatos ayaa ku yidhi,

"Miyaadan ila hadlayn? Miyaadan ogayn inaan leeyahay awood aan kugu sii daayo iyo awood aan iskutallaabta kugu qodbo?" [11] Yeshuuca ayaa ugu jawaabay, "Awood igu ma lahayd haddii aan xagga sare lagaa siinin. Sidaa darteed kii ii soo ka gacangeliyay wuxuu leeyahay dembi ka wayn."

[12] Laga bilaabo wakhtigaas, Bilaatos wuxuu isku dayay inuu sii daayo isaga, laakiin Yuhuuddii ayaa qayliyeen, "Haddaad ninkan sii daysid, Kaysar saaxiibkii ma tihid. Waayo qof kasta oo boqor iska dhiga, wuu ka soo horjeedaa Kaysar. [13] Haddaba Bilaatos markuu erayadan maqlay, ayuu Yeshuuca dibadda u keenay oo wuxuu ku fadhiistay kursiga xukunka, meesha la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa oo af Cibraaniga lagu yidhaahdo Gabbata.

[14] Hadda waxay ahayd maalintii la isku diyaarinayay Iiddii Kormaridda. Waxay ahayd qiyaastii saacaddii lixaad. Wuxuu ku yidhi Yuhuudda, "Bal eega, boqorkiinna." [15] Waxay ku qayliyeen, "isaga Kaxee, isaga Kaxee, iskutallaabta ku qodob." Bilaatos wuxuu ku yidhi iyaga, "Boqorkiina miyaan iskutallaabta ku qodbaa?" Wadaaddadii sare ayaa ugu jawaabay, "Boqor kale ma lihin Kaysar mooyaane." [16] Markaasuu u dhiibay isaga inuu iskutallaabta loogu qodbo.

## Iskutallaabta

sss
[17] Sidaa darteed waxay kaxeeyeen Yeshuuca.
Isagoo iskutallaabtiisa wata ayuu yimid
meeshii la yidhaadho Lafmadax, oo af
Cibraaniga lagu yidhaadho Golgota. [18] Halkaas
ayay iskutallaabta ku qodbeen, isaga iyo laba
kale, mid dhinac kasta, oo Yeshuucana
dhexdooda. [19] Bilaatos cinwaan buu qoray oo
ku dhejiyay iskutallaabta dusheeda, waa la
qoray, "YESHUUCA REER NAASARED,
BOQORKA YUHUUDDA." [20] Yuhuudda badan
ayaa cinwaankan akhriyeen, waayo, meeshii
Yeshuuca iskutallaabta lagu qodbayay waa u
dhowayd magalaada, oo waxaa lagu qoray af
Cibraaniga, af Roomaaniga iyo af Giriigga. [21]
Sidaa darteed wadaaddadii sare ee Yuhuudda
waxay Bilaatos ku yidhaahdeen, "Ha qorin,
‘Boqorka Yuhuudda,’ laakiin, ‘Ninkan yidhi,
‘Waxaan ahay Boqorka Yuhuudda.” [22] Bilaatos
ayaa ugu jawaabay, "Wixii aan qoray waxaan
qoray."
[23] Askartii markay Yeshuuca iskutallaabta ku
qodbeen, maradiisa ayay qaateen oo afar
qaybood u kala qaybsadeen, hal qayb askari
kasta. Maradii uu hoosta ka xirnaa meelna
kama tollayn kor illaa hoosta. [24] Markaasay
isku yidhaahdeen, "Yeynaan kala jeexin,
laakiin aan u saami ridanno si aynu u aragno
kii heli doona. Tan waxay ahayd in loo fuliyo
Qorniinka oo leh;

Waxay kala qaybsadeen dharkayga,
Oo maradayda way u saami rideen.”

Waxyaalahan askartii ayaa sameeyeen, [25]
laakiin iskutallaabtii Yeshuuca waxaa ag

taagnaa hooyadiis, iyo walaashiis hooyooyinka, Maryan ahayd xaaskii Kaloobaas, iyo Maryan tii reer Magdala. 26
Markuu Yeshuuca arkay hooyadiis iyo xertii uu jeclaa oo ag taagan, ayuu hooyadiis ku yidhi, "Islaan, bal eeg, wiilkaaga.” 27 kadib wuxuu ku yidhi xerta, “Bal eeg, hooyadaa.” Laga bilaabo wakhtigaas xerta ayaa gurigiisa u geeyay iyada.

## Geeridii Yeshuuca

28 Waxyaalahan kadib, Yeshuuca wuu ogaa in wax walba dhammaadeen (si loo fuliyo Qorniinka) wuxuu ku yidhi, "Waan
harraadsanahay." 29 Weel uu khalkii ku jiro ayaa halkaas jiray. Sidaa darteed isbonji bay khalkii ka buuxiyeen, oo waxay saareen laan husob ah oo afkiisa ku dhoweeyeen. 30
Haddaba markuu Yeshuuca khalkii qaatay, ayuu yidhi, "Way dhammaatay" kadibna madaxiisa ayuu foororiyay oo ruuxiisa bixiyay.

## Dhinac Yeshuuca waa la dalooliyay

31 Hadda waxay ahayd maalintii diyaarinta, si ayna meydadka Sabtida iskutallaabta u sii saaraan, (waayo maalintii sabtida waxay ahayd maalin wayn), Yuhuuddii waxay Bilaatos waydiiyeen in lugaha laga jebiyo oo meydadka
laga saaro. 32 Haddaba askartii way
yimaadeen oo ay lugaha ka jebiyeen ninkii ugu

sss
horeeyay iyo kii kale oo iskutallaabta lagula
qodbay isaga. 33 Laakiinse markay Yeshuuca u
yimaaddeen oo arkeen inuu durba dhintay,
kama ay jebinin lugihiisa. 34 Laakiin mid askartii
ka mid ah ayaa dhinaciisa waran kaga
dalooliyay, oo isla markii waxaa ka soo baxay
dhiig iyo biyo. 35 Kii waxyaalahan arkay ayaa
marag furay, maraggiisuna waa run, wuuna og
yahay inuu run sheegayo, si aad idinku u
rumaysataan. 36 Waayo, waxyaalahan waxay u
dhaceen si loo fuliyo Qorniinka:

> *[6]'Lafihiisa midna ma jabin doono.'

37 Oo Qorniin kale wuxuu leeyahay,

> *[7]"Way arki doonaan kii ay dalooliyeen."

## Yeshuuca Waa La Aasay

38 Waxyaalahan kadib, Yuusufkii reer
Arimataya, isagoo xerta Yeshuuca ka mid
ahaa, laakiin si qarsoodi ah waayo wuxuu ka
cabsaday Yuhuudda, wuxuu Bilaatos ka
baryay inuu jidhka Yeshuuca qaado, oo
Bilaatosna wuu u ogolaaday. Sidaa darteed
wuu yimid oo jidhkiisii qaaday. 39 Sidoo kale
Nikodemos kii mar hore habeenkii u yimid
Yeshuuca, wuxuu keenay malmal iyo cuud uu
isku qasay oo qiyaastii soddon iyo afar kiillo
ah. 40 Haddaba waxay qaadeen jidhkii
Yeshuuca oo ku duuduubeen maro iyo dhir

---

[6] Sabuurradii 34:20
[7] Sekaryaah 12:10

udgoon sida caadadii aasniinta Yuhuuddu ahayd. [41] Hadda meeshii Yeshuuca iskutallabta lagu qodbay waxay ahayd beer, beerta dhexdeedana waxaa ku yaalay xabaal cusub oo aan cidna weli laga dhigin. [42] Waayo waxay ahayd Maalintii diyaariinta oo Yuhuudda, waxay halkaas Yeshuuca u dhigeen, waayo, xabaashii way u dhowayd.

## Yeshuuca Wuu Ka Soo Sarakacay Kuwii Dhintay

**20** Maalintii ugu horeeysay ee asbuucda, Maryan Magdala ayaa aroortii xabaashii timid, intay weli mudgi ahayd, oo waxay aragtay dhagaxii oo xabaashii laga qaaday. [2] Sidaa darteed way ordaysay oo u timid Simoon Butros iyo kii kale oo xerta ka mid ahaa oo uu Yeshuuca jeclaa, waxayna ku tidhi, "Rabbigaa way ka qaadeen xabaashii, mana garanayno meel ay dhigeen." [3] Sidaa darteed Butros iyo xertii kale way baxeen oo xabaashii ayay tageen. [4] Labadooda way wada ordeen, laakiin xertii kale ayaa ka hor orday Butros oo uga dheereeyey oo hortiis gaadhay xabaasha. [5] Hoos buu eegay wuxuuna arkay maro halkaas taalay, laakiinse ma uusan gelin. [6] Kadibna Simoon Butros oo daba socday ayaa yimid oo xabaashii galay. Wuxuu arkay maradii halkaas taalay, [7] iyo maradii Yeshuuca madaxiisa saaran jiray aan maradii kale la taalin, laakiin

keligeed ayay ku duuduubnayd iyadoo gooni u
taala. 8 Marka xertii kale oo ka hor xabaashii u
gaadhay ayuu galay, wuuna arkay oo rumayay.
9 Waayo, weli Qorniinka mayna fahmin, inuu
dhimashada ka sarakici doono. 10 Kadibna
xertii waxay guryahoodii ku soo laabteen.

## Yeshuuca Wuxuu U Muuqday Maryan Magdala

11 Laakiin Maryama xabaasha ayay agtaagan
iyadoo ooyneysay, oo intay ooyaysay ayay
foororsatay inay xabaashii dhex fiirinaysay. 12
Oo waxay aragtay laba malag oo dhar cad
qaba oo fadhiya meeshii jidhka Yeshuuca la
dhigay, midna madaxa, midna cagaha. 13 Oo
waxay ku yidhaahdeen, "Haween yahay,
maxaad u ooyaysaa?" Waxay ku tidhi,
"Rabbigaygii bay qaateen oo ma garanayo
meeshay isaga dhigeen." 14 Markay sidan ku
tidhi, waxay dib u jeesatay oo aragtay
Yeshuuca oo taagan, laakiin ma ogayn inuu
Yeshuuca yahay. 15 Yeshuuca wuxuu ku yidhi,
"Naag yahay, Maxaad u ooynaysaa? Yaad
raadinaysaa?" Iyada oo u malaynaysa inuu
yahay beeralayda ayay ku tidhi, "Mudane,
haddaad isagii ka qaadday, ii sheeg halkaad
dhigtay, waan ka soo qaadanayaa." 16
Yeshuuca wuxuu ku yidhi, "Maryan."
Markaasay jeesatay isaga oo af Cibraani ku
tidhi, "Rabboni!” (oo macneheedu yahay
macalinow). 17 Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Ha i

qabanin, waayo, weli Aabbaha kor uguma tagin, laakiin walaalahay u tag oo u sheeg, “Waxaan kor ugu tegayaa Aabbahay iyo Aabbihiin, Ilaahayga iyo Ilaahiina." [18] Maryan Magdala ayaa timid oo xertii ku tidhi, "Rabbiga ayaan arkay” iyo inuu waxyaalahan iyadii ku yidhi.

## Yeshuuca Wuxuu u Muuqday Rasuulladii

[19] Fidkii maalintaas, oo maalintii ugu horraysay asbuucda, markii xertii ay isla joogeen oo albaabka xiranyahay cabsida ay Yuhuudda ka qabteen darteed, Yeshuuca ayaa yimid oo uu iyaga dhexdooda istaagay, oo wuxuu ku yidhi, "Nabadi ha idin la jirto." [20] Markuu sidan yidhi, wuxuu iyagii tusay gacmihiisa iyo dhinaciisii. Sida darteed xertii way farxeen markay Rabbiga arkeen. [21] Haddana Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Nabad ha idin la jirto. Sida Aabbuhu ii soo diray ayaan anna idiin dirayaa." [22] Oo markuu sidan yidhi, ayuu ku neefsaday iyaga oo ku yidhi, "Ruuxa Qudduuska ah qaado. [23] Haddaad qof cafiso dembigiisa, way la cafiyanyihiin; haddii aadan cafiyin, looma cafiyo.

## Yeshuuca iyo Toomas

[24] Laakiin Toomas, mid laba iyo tobanka ka mid ah, waxaa lagu odhan jiray Didumos, xertana

lama uusan joogin goortuu Yeshuuca yimid. 25
Haddaba xertii kale ayaa ku yidhi, "Rabbiga
ayaannu aragnay." Laakiin wuxuu ku yidhi
iyaga, "Haddaanan gacmihiisa ku arkin
calaamaddii musbaarrada, oo aanan fartayda
gelin nabarkii musbaarrada, oo aanan
gacantayda gelin dhinaciisa, weligay ma
rumaysan doono."
26 Siddeed maalmood kadib xertiisii gudaha
ayay mar kale wada joogeen, Toomasna wuu
la joogay. Inkastoo albaabku xidhan, Yeshuuca
baa yimid, oo intuu dhexdooda istaagay oo ku
yidhi, "Nabad ha idin la jirto." 27 Kadibna wuxuu
Toomas ku yidhi, "Halkan fartaada saar, bal fiiri
gacmahayga oo gacantaada keen oo
dhinacayga gali. Ha shakiyin laakiin rumayso."
28 Toomas ayaa u jawaabay, "Rabbigayga iyo
Ilaahaygow." 29 Kadibna Yeshuucu ku yidhi,
"Miyaad rumaysatay waayo waad i aragtay?
Waxaa barakaysan kuwa aan arkin oo
rumaystay."

## Ujeeddada Kitaabkan

30 Hadda Yeshuuca wuxuu ku sameeyay
calaamooyin kale oo badan xertii hortooda,
taas oo aan ku qorin kitaabkan. 31 Laakiin
waxyaaalahan waxaa loo qoray si aad u
rumaysataan Yeshuuca inuu yahay Masiixa,
Wiilka Ilaah, iyo inaad nolosha ku lahaataan
magaciisa idinkoo rumaysanaysaan.

# Yeshuuca Ayaa u Muuqday Toddoba Xerta Ah

**21** Markaa kadib Yeshuuca ayaa mar kale
xertiisa isu muujiyay Badda Tiberiyas agteeda.
Oo sidan ayuu isu muujiyay. 2 Simoon Butros,
iyo Toomaskii (Didumos la odhan jiray), iyo
Nataana'el kii Qaanadii Galili, iyo wiilashii
Sebedi, iyo laba kale oo xertiisa ah ayay wada
joogeen. 3 Simoon Butros wuxuu ku yidhi
iyaga, "Waan soo kalluumaysanayaa." Iyaguna
waxay ku yidhaahdeen, "Annaguna waan ku
raacaynaa." Kadibna way tageen oo doonta
fuuleen; laakiin habeenkaas waxba mayna
qabanin.
4 Subaxdii hore, Yeshuuca ayaa xeebta
istaagay, laakiin xertuna ma ogayn inuu
Yeshuuca yahay. 5 Marka Yeshuuca ayaa ku
yidhi, "Carruur yahay, ma haystaan wax
kalluun ah?" Waxay ugu jawaabeen, "Maya." 6
Markaasuu ku yidhi, "Shabaga ku tuura
dhinaca midig ee doonta, waadna heli
doontaan." Haddaba way tuureen, oo way
qaadi waayeen kalluunka, waayo way fara
badan yihiin. 7 Kii xertaa ahaa oo uu Yeshuuca
jeclaa ayaa ku yidhi Butros, "Waa Rabbiga."
Simoon Butros markuu maqlay inuu Rabbiga
yahay, ayuu maradiisa xidhay (waayo, wuu ka
saaray) oo ku booday badda. 8 Laakiin xerta
kale waxay ku yimaadeen doonta, iyaga oo
shabag uu kalluun ka buuxo jiidayeen, waayo

kama ay fogayn dhulka oo qiyaas sagaashan
mitir.
9 Markay dhulka u soo dageen, waxay arkeen
dab dhuxul ah iyo kalluun iyo kibis saaran
yihiin. 10 Markaasuu Yeshuuca ku yidhi iyaga,
"Keena qaar kalluunka aad soo qabateen." 11
Haddaba Simoon Butros ayaa doontii fuulay,
oo wuxuu xagga dhulka u soo jiiday shabaggii
oo ka buuxa boqol iyo konton iyo saddex
kalluun oo waaweyn. Inkastoo ay aad u fara
badnaayeen, shabaggii ma dilaacin. 12
Yeshuuca ayaa ku yidhi iyaga "Kaalaya oo
quraacda." Hadda Xerta midkoodna kuma
dhicin inuu weydiiyo, "Yaad tahay?" waayo,
way ogayeen inuu Rabbiga yahay. 13 Marka
Yeshuuca ayaa yimid oo qaaday kibista oo
siiyay iyaga, kalluunkiina sidaas oo akle ayuu
ku sameeyay. 14 Tanu waa markii saddexaad
oo Yeshuuca xertiisa isu muujiyey markii uu
dhimashada ka soo sarakacay kadib.

## Yeshuuca iyo Butros

15 Markay quraacdeen kadib, Yeshuuca wuxuu
Simoon Butros ku yidhi, "Simoon Ina
Yooxanaa, Ma iga jeceshahay kuwan?” Wuxuu
ku yidhi, "Haah, Rabbiyow, waad ogtahay
inaan ku jeclahay." Markaasuu ku yidhi,
"Baraarkayga daaji." 16 Mar labaad ayuu ku
yidhi isaga, "Simoon Ina Yoxaanaa, ma i
jeceshahay?" Wuxuu ku yidhi, "Haah,
Rabbiyow, waad ogtahay inaan ku jeclahay."

Markaasuu ku yidhi, "Idahayga ilaali." 17 Markii
saddexaad ayuu ku yidhi, "Simoon Ina
Yooxanaa, Ma i jeceshahay?" Butros wuu
niyad jabay, waayo, markii saddexaad wuxuu
weydiiyay, "Miyaad i jeceshahay?” Markaasuu
ku yidhi, "Rabbiyow, wax walba waad ogtahay,
waad garanaysaa inaan ku jecelahay."
Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Idahayga daaji. 18
Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Markaad
yarayd waxaad dharka isu xiri jirtay oo meeshii
aad rabtid ayaad tagi jirtay, laakiin markaad
duqowdid, gacmahaaga ayaad fidhin doontid,
oo qof kale ayaa dharka kuu xiri doona oo
wuxuu kuu geeyn doona meel aaadan rabin
inaad tagto." 19 (Wuxuu sidan u yidhi, si uu u
tilmaamo nooca dhimashada uu Ilaah ku
ammaani doono.) Markuu sidan yidhi kadib,
wuxuu ku yidhi, "Isoo raac."

## Yeshuuca iyo Kii Xerta Loogu Jeclaa

20 Butros markuu jeestay wuxuu arkay kii xerta
ahaa oo uu Yeshuuca jeclaa oo daba socda
iyaga; kan waa kii laabta Yeshuuca ku
tiirsanaa wakhtigii cashada oo ku yidhi,
"Rabbiyow, yaa ku gacangelin doonaa?" 21
Butros markuu arkay isaga, wuxuu Yeshuuca
ku yidhi, "Rabbiyow, ka warran isaga?" 22
Yeshuuca ayaa ku yidhi, "Haddaan doono inuu
joogo ilaa aan ka soo laabto, maxaa kaa
khuseeya? Adigu i soo raac!" 23 Sidaa darteed

hadalku xertii ku dhex fidhay, ‘xertaas ma dhiman doono.’ Laakiin Yeshuuca ma dhihin, ‘ma dhiman doono.’ laakiin, "Haddaan doonayo inuu joogo ilaa aan ka soo laabto, maxaa kaa khuseeya?"
24 Kanu waa kii xerta ahaa oo waxyaalahan u marag fura, kaaso waxyaalahan qoray, waana ognahay inuu maraggiisa run yahay.
25 Hadda waxaana jira waxyaalo badan oo kale oo Yeshuucu sameeyay, oo haddii mid walba la qori lahaa, waxaan u malaynayaa in dunida oo dhan ma qaadi kari lahayn buugaagta la qori lahaa.

sss

# Mahad Gaar Ah

Bible Society of Kenya
Biblica Internasional Bible Society
English Standard Version

*(Baybalkan waxaa loo adeegsaday tixraac ahaan turjumaada Kitaabkan).*

sss